



# Warbixinta Sanadaha ah ee Golaha Aqalka Sare

2018

The Upper House  
Annual Report  
2018

## TUSMADA BUUGGA

<b>GOLAHA AQALKA SARE.....</b>	<b>5</b>
Oraahda Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare.....	5
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.....	7
Qaabdhismeedka Dowladda Federaalka Soomaaliya .....	8
Kaalinta Golaha Aqalka Sare .....	10
Kaalinta Xeer Dejineed:.....	10
Kaalinta Baariseed .....	11
Kaalinta Metelaadda.....	11
Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare: .....	11
Habraaca Xeer Dejineed.....	12
Sidee Hindise-Sharchiyeed Sharci Ku Noqdaa? .....	12
<b>SENATARADA .....</b>	<b>14</b>
Xogta Senatarada .....	14
Sida Loo Soo Doortay Senatarada .....	14
Metelaadda Shacabka Deegaan Dooroshooyinka .....	15
Deegaan Dooroshooyinka Senatarada.....	15
<b>WAXQABADKA GOLAHA AQALKA SARE .....</b>	<b>22</b>
Fadhiga Guud Ee Golaha.....	22
Habraaca Meel Marinta Shuruucda .....	22
Sida Ajendaha Golaha Guud Loo Sameeyo.....	23
Wax Qabadka Golaha Guud .....	23
Jadwalkii Shaqo Ee 2018 (Calendar) .....	25
Sida Loo Fariisto Golaha Guud.....	26
Shuruurcda Ku Soo Wajahan Golaha Aqalka Sare.....	27
Raad-Raaca Shuruucdii La Horkeenay Golaha Aqalka Sare.....	27
Guddiyada Golaha Aqalka Sare .....	28
Qaab-Dhismeedka Guddiyada.....	28
Noocyada Guddiyada Golaha Aqalka Sare.....	28

Xubnaha Guddiyada Iyo Sida Loo Soo Xulay.....	29
Guddiga Joogtada Ah Ee Golaha Aqalka Sare.....	29
Guddiga Garsoorka, Arrimaha Diinta & Awqaafتا, Xuquuqul Insaanka, Haweenka Iyo Carruurta.....	29
Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabeyaasha Dhaqaalaha & Gaadiidka.....	29
Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada, Arrimaha Bani'aadannimada, Warfaafinta Iyo Dhaqanka.....	30
Guddiga Amniga Iyo Difaaca.....	30
Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta Iyo Dalxiiska.....	30
Guddiga La Socodka Dib-U-Eegista Iyo Hirgelinta Dastuurka (Aqalka Sare) 30	
Guddiga Arrimaha Dibedda Qorsheynta, Maalgashiga Iyo Iskaashiga Caalamiga Ah: .....	30
Guddiga Arrimaha Gudaha, Dib-U-Heshiisiinta Iyo Xiriirkha Dowladaha Xubnaha Ka Ah Dowladda Federaalka.....	30
Guddiga Xeer Hoosaadka, Anshaxa, Xasaanadda Iyo Daryeelka Senatarada..	31
Ururka Haweenka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya — Golaha Aqalka Sare .....	31
Waxqabadka Guddiyada .....	31
<b>METELAADDA DOWLADAH XUBNAHA KA AH DOWLADDA FEDERAALKA .....</b>	<b>32</b>
Xal U Helidda Khilaafka U Dhxeeyay Dowladda Federaalka Iyo Dowlad Goboleedyada .....	32
Safarka Guddoomiyaha Ee Kismaayo.....	37
Safarka Guddoomiye Ku Xigeenka laad Ee Gaalkacyo.....	38
Safarka Guddoomiye Ku Xigeenka 2Aad Ee Garowe.....	38
Ka Talo Gelinta Hindise Sharciyeedyada.....	38
Ka Qeybgalka Caleemo-Saarka Madaxweynayaal Cusub .....	40
<b>METELAADDA BULSHADA SOOMAALIYEED.....</b>	<b>41</b>
Ka Qeybqaadashada Gurmadkii Fatahaadaha.....	41
Shaqaaleysiinta Dhalinyarada Aqoonyahanka Ah .....	42
Xoojinta Xiriirkha Dadweynaha .....	43

<b>XIRIIRKA CAALAMIGA EE GOLAHA AQALKA SARE .....</b>	<b>44</b>
Kulamada Guddoonka Iyo Diblomaasiyiinka .....	44
Safarada Dibedda Ee Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare .....	47
Arrimo Kale.....	48
<b>MAAMULKA GOLAHA AQALKA SARE.....</b>	<b>49</b>
Oraahda Xoghayaha Guud Ee Golaha Aqalka Sare .....	49
Wax Qabadka Maamul Ee Guddoonka .....	50
Shaqaalaha Golaha Aqalka Sare & Waajibaadkooda .....	50
Qaab-Dhismeedka Maamul Ee Golaha Aqalka Sare.....	51
Waxqabadka Maamulka Golaha Aqalka Sare .....	52
Lifaaqyo: .....	54

# 1

## GOLAHA AQALKA SARE

### ORAAHDA GUDDOOMIYAH A GOLAHA AQALKA SARE

Allaa iska leh mahad oo dhan, Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa loo unkay in uu udub dhextaad u noqdo hirgelinta nidaamka federaalka isla markaasna uu isku xiro labada heer dowladeed.



**Sen. Cabdi Xaashi Abdullaahi**  
Guddoomiyah Golaha  
Aqalka Sare

Golaha Aqalka Sare wuxuu sannadkii 2018 diiradda saaray in uu u guto xilka loo igmaday si isu dheellitiran isaga qaatay kaalintiisa ku aaddan xeer dejinta Dalka, la xisaabtanka laanta fulinta, iyo isku xirka labada heer dowladeed. Goluhu wuxuu sida oo kale xoojiyay xiriirkiiisa caalamiga ah.

Golaha Aqalka Sare wuxuu labo sano jirsaday 28 Disembar 2018, waxaana sannadkii 2018 u qabsoomay howlo kala duwan oo ay ka mid yihii:

- » Gudashada xilkiisa xeer dejineed isaga oo meel mariyay Xeerka Dhowridda Gobonnimada & Midnimada Gayiga Soomaaliyeed, Xeerka Kheyraadka Biyaha & Dhismaha Hay'adda Maareynta Biyaha Qaranka, Xeerka Dhismaha Guddiyada Madaxabannaan ee la dagaallanka musuq maasuqa ee Labada Heer iyo Xeerka Dhismaha Hay'adda Naafada Qaranka, guddoomayna Xeerka Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka iyo Xeerka Xaq-siinta Siyaasiyiinta Dowladda.
- » La xisaabtanka Xukuumadda iyo xafiisyada kale ee Qaranka isagoo u yeeray, su'aalana weydiyyay dhowr wasiir iyo madaxda xafiisyada kale.
- » Soo saarid qaraaro ku abbaaran arrimo markaa mudnaa in Goluhu ka hadlo go'aanna ka gaaro sida hannaanka maamulidda arrimaha xajka iyo cumrada, gurmaddii fatahaadaha, iyo u kala diridda guddiyo gaar ah dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

- » Qaadashada kaalintiisa odaynimo oo lagu dhix dhixaadiyay khilaafkii u dhixeyay Xukuumadda Federaalka ah iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladha Federaalka.
- » Xoojinta xiriir wanaagsan oo Goluhu la leeyahay Hey'adaha Dowladha Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladha Federaalka, Beesha Caalamka, iyo Baarlamaannada Adduunka.

Golaha Aqalka Sare isaga oo gudanaya waajibaadkiisa Dastuuriga ah wuxuu dib u eegis ku sameeyaa hindise sharchiyeedyada ay soo curiso Xukuumadda Federaalka iyo dhammaan shuruucda kale ee uu curiyo Golaha Aqalka Sare ama Golaha Shacabka.

Haddaba, mas'uuliyadda Golaha Aqalka Sare waa mid ballaaran oo suurtogelineysa hirgelinta iyo ilaalinta nidaamka federaalka iyada oo la dhowrayo danta Qaranka. Shaqada Golaha Aqalka Sare waxaa haga Dastuurka Federaalka KMG ah iyo Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

Goluhu wuxuu xoojin doonaa kaalintiisa ku aaddan xallinta khilaafaadka ka dhix dhasha hay'adaha dastuuriga ah ee Dowladha Federaalka iyo khilaafaadka u dhaxeeya Dowladha Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladha Federaalka.

Golaha Aqalka Sare waxaa ka go'an in uu joogteeyo xiriirkha dhow ee uu la leeyahay Hay'adaha Dowladha Federaalka iyo Hay'adaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladha Federaalka isaga oo had iyo jeer u taagnaan doono in uu gutu xilka culus ee loo igmaday.

Ugu dambeyntii, Guddiga Joogtada ah ee Golaha, Guddiyada Golaha, iyo Xafiisyada Maamul ee Golaha waxay muujiyeen dedaal dheeraad ah oo wax ku ool ah iyaga oo u gutay waajibaadkooda si hufan oo ay ku dheehan tahay kowl karnimo iyo xil gudasho hagar la'aan ah.

Waxaan u rajeynayaa Golaha iyo howlwadeennadiisa sannado kale oo kheyr iyo baraare leh.

### **SEN. CABDI XAASHI CABDULLAAHI**

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare

## JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Soomaaliya tan iyo xilligii xorriyadda ay qaadatay waxay ku dhaqmi jirtay nidaamka dowladda dhewe (central government), taas oo laheyd baarlamaan hal gole ah loona yaqiinnay Golaha Ummadda (National Assembly 1960 - 1969) ama Golaha Shacabka (1969 - 2012). Dowladnimadii Soomaaliya waxay burburtay 1991-kii wuxuuna Dalku galay marxalad dagaal sokeeye iyo duruufo nololeed oo adag. Sannadkii 2000, iyada oo laga faa'ideysanayo kaalmada Beesha Caalamka, Siyaasiyiinta Soomaaliyeed waxa ay garowsadeen in ay ka shaqeeyaan sidii dib loogu yagleeli lahaa dowladnimada Soomaaliya waxaana dhowr shir oo lagu kala qabtay dalalka deriska ah ku dhismay dowlad ku meel gaar aheyd oo lagu dhisay Magaalada Carta ee Dalka Jabuuti, taas oo ujeeddadeedu aheyd in dib heshiisiin dhab ah laga dhexdhaliyo Beelaha Soomaaliyeed ee ku dagaallamay Dalka. Sannadkii 2004tii Ergadii Soomaaliyeed ee ka qeybgashay shir lagu qabtay Deegaanka Embagati ee Dalka Kenya waxa ay ku heshiiyeen Axdi Federaal ah oo lagu dhisay Dowladda Madaxweynihii hore Cabdillaahi Yuusuf Axmed Allah u naxariistee iyo Dowladdii ka dambeysay ee uu hoggaaminaayay Madaxweyne

Sheekh Shariif Sheekh Axmed. Xilligaas ayuuna isbeddelay nidaamkii dowladeed ee Dalka isaga oo noqday nidaamka loo yaqaanno federaalka. Xilligii Dowladdii Madaxweyne Shariif waxaa qabsoomay shirarkii loogu magac daray Garowe I iyo Garowwe II halkaas oo looga heshiiyay mabaadii'da asaasiga ah ee federaalka waxaan la isla qaatay in la dhiso Golaha Aqalka Sare oo loo arkay in uu udub dhexaad u yahay hirgelinta nidaamka federaalka. Ugu dambeyntii, isla xilligii Dowladdii Madaxweyne Shariif waxaa la soo gebagebeeyay qabyo-qoraalka Dastuurka Federaalka ku meel gaarka ah ee haatan dhaqangalka ah waxaana ansixiyay Golaha Ansixinta Dastuurka Qaranka (Ergo ka koobneyd 825 ruux) 1da Agoosto 2012 xilligaas ayuuna Dalku ka baxay ku meel gaarnimadii. Dastuurka Federaalka ee ku meel gaarka ah wuxuu wax ka beddelay qaab-dhismeedkii hey'adda xeerdejinta ee Dalka oo inta laga ogyahay Sooyaalka Dowladnimo ee Soomaaliya aheyd hey'ad hal gole ah laguna magacaabi jiray Golaha Ummadda iyo Golaha Shacabka. Dastuurka Federaalka ee la ansixiyay 1di Agoosto ayaa dhisay hey'ad xeerdejin ah oo ka kooban labo gole kuwaas oo kala ah: Golaha Aqalka Sare iyo



Golaha Shacabka oo wadajirkoodu noqonayaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, laga soo billaabo Baarlamaankii 9aad (2012 – 2016) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, Golaha Aqalka Sare ayaan dhismi karin mudda xileedka Baarlamaankii 9aad; maadaama Dowladaha Xubnaha ka noqon lahaa Dowladda Federaalka aysan badankoodu dhisneyn, kuwaasi oo uu ku meteli lahaa Goluhu Hey'adda Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sida uu dhig-ayo Qodobka 61aad (3) iyo Qod.7aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya. Si loo daboolo loona buuxiyo kaalinta Golaha Aqalka Sare aya Golaha

Shacabka, oo xilligaa dhisnaa, u oggolaaday Dastuurku inuu qabto hawlaho iyo xilalka Golaha Aqalka Sare illaa iyo inta laga soo dhisayo Golaha Aqalka Sare sida uu xeerinayo Qod.138aad (2), sidaas ayuuna Golaha Shacabku u shaqeeyay ilaa 28kii Diseembar 2016, markaas oo loo dhaariiy Xubnaha Golaha Aqalka Sare qabashada xilka senatarnimo.

Ka dib dhaarinta Mudaneeyaasha Golaha Aqalka Sare, waxaa si rasmi ah u dhismay una hawlgalay Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Qaab-dhismeedka Dowlaadeed ee Dalka wuxuu noqday sidatan:

## **QAABDHISMEEDKA DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**AQALKA SARE  
54 SENATAR**

**GARSOORKA**

**MADAXWEYNHA  
JAMHUURIYADDAA  
FEDERAALKA  
SOOMAALIYA**

**GOLAHADHISMEEDKA  
275 XILDHIBAAN**

**GOLAHAWASIIRADA**

Sida shaxda sare ku cad, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laan ka tirsan seddexda laamood ee Dowlaadda Federaalka Soomaaliya halka labada laamood kale ay kala yihin Laanta Fulinta iyo Laanta Garsoorka.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa madaxa Dowlaadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ka mana mid aha laanta fulinta, waxaana doorta labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo wada fadhiya. Madaxweynuhu waa astaanta midnimada Qaranka, ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadii'da asaasiga ah ee Dastuurka.

Madaxweynuhu wuxuu magacaabayaa xilka wasiirka kowaad oo isaguna soo magacaaba Golihiiisa Wasiirada, wuxuu sidoo kale magacaaba saraakiisha sare ee Dowlaadda Federaalka, wuxuu furaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, wuxuu saxiixaa shuruucda uu soo ansixiyo Baarlamaanka Federaalka. Madaxweynaha Jamhuuriyaddu waa Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida, wuxuu saxiixaa heshiisyada caalamiga ah ka dib markii Golaha Wasiirradu uu meel mariyo, Baarlamaankuna uu ansixiyo, wuxuu kale uu leeyahay awodaha kale ee ku xusan Qod.90aad ee Dastuurka KMG ah.

Laanta Fulinta (Xukuumadda) — oo ka kooban Ra'iisul Wasaaraha iyo Golihiiisa Wasiirada — waxay qaabilsan tahay dejinta siyaasadda guud ee Dalka iyo dhaqangelinteeda, diyaarinta hindise sharchiyadeedyada iyo soo-hor-dhigiddooda Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, diyaarinta miisaaniyad-

sannadeedka, xisaab-xirkeeda iyo xiriirka caalamiga ah.

Garsoorka Dalku wuxuu leeyahay seddex heer oo kala ah sida ku cad Dastuurka KMG ah:

- a) Maxkamadda Dastuuriga
- b) Maxkamadaha Dowlaadda Federaalka

- c) Maxkamadaha Dawladaha xubinaha ka ah Dawlada Federaalka

Maxkamadda ugu sarreysa xaga derejooyinka Maxkamadaha Federaalka waa Maxkamadda Sare ee Federaalka iyada oo Dowladaha xubinta ka ah Dowlaadda Federaalka iyaguna ay yeelanayaan Maxkamado Sare oo u gaar ah.

Laanta sharci-dejinta ama Baarlamaanka Federaalka waxay ka kooban tahay labo gole: Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare. Labadaan gole ayaa u xilsaaran xeer dejinta Dalka, metelaadda shacabka, iyo dowlad goboledyada; habraacooda xeer dejineedna wuxuu ku qeexan yayah dastuurka KMG ah.



## **KAALINTA GOLAJHA AQALKA SARE**

Golaha Aqalka Sare wuxuu metelaa danaha Dowlad Goboleedyada isla markaasna wuxuu ilaaliyaa hirgelinta nidaamka federaalka si waafaqsan danta guud ee Qaranka sida ku cad Qod.61aad (1)(3) ee Dastuurka KMG ah. Golaha Aqalka Sare wuxuu si taxaddar leh dib ugu eegaa shuruucda uu soo meel mariyay Golaha Shacabka iyo shuruucda kale ee ay soo gudbiso Xukuumadda Federaalka; si looga hortago shuruuc lagu degdegay ama aan waafaqsaneyn danta guud ee Qaranka.

Golaha Aqalka Sare oo ka kooban 54 Senatar wuxuu si isu dheellitiran u gutaa howlaha kormeerka, dib-u-eegista shuruucda iyo u kuur-gelidda Siyaasadda Guud ee Qaranka iyo arrimaha ahmiyadda gaarka ah u leh Ummadda Soomaaliyed isaga oo adeegsanaya fadhiyada Golaha Guud iyo Guddiyada Golaha. Golaha Aqalka Sare wuxuu sidoo kale ilaaliyaa danaha dadka laga tirada badan yahay iyo kuwa baahiyaha gaarka ah qaba. Goluhu wuxuu leeyahay seddexda kaalin ee uu leeyahay gole baarlamaan: kaalin xeer-dejineed, kaalin baariseed iyo kaalin metelaad.

### **KAALINTA XEER DEJINEED:**

- Hindise-sharchiyeed kasta oo uu ku jiro sharciga Miisaaniyadda Qaranka waa in la soo marsiiyaa Golaha Aqalka Sare si uu uga baaraandego ugana gaaro go'aan gole.
- Aqalka Sare wuxuu ansixin karaa, dib u dhigi karaa ama diidi karaa hindise-sharchiyeedyada la horkeeno.
- Aqalka Sare wuxuu curin karaa hindise-sharchiyeed kasta marka laga reebo miisaaniyadda sanadlahaa ah ee Qaranka.

- Aqalka Sare wuxuu dib u eegis ku sameeyaa kana soo saaraa qaraaro arrimaha sameynta guud ku leh Bulshada Soomaaliyeed<sup>11</sup> iyo siyaasadaha guud ee Qaranka.
- Aqalka Sare wuxuu kalsooni siiyaa ama kala noqdaa hey'adaha dastuuriga iyo xubnahoma sida Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka, Guddoomiyaha iyo Xubnaha Maxkamadda Sare, Guddoomiyaha iyo Xubnaha Maxkamadda Dastuuriga ah, Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka, Xubnaha Guddiyada Madaxabannaan, iyo kuwo kale.

## **KAALINTA BAARISEED**

- Senatarada iyaga oo adeegsanaya aqoontooda iyo khibraddooda shaqo waxay wareysi xog raadin ah la yeeshaan cid kasta oo muwaadin ah iyo mas'uul kasta oo ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya ama Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladha Federaalka; si ay u helaan xog wax ku ool ah oo go'aan lagu qaadan karo.
- Senatarada waxay si qoto dheer u qiimeeyaan arrimaha xasaasiga ah si madaxbanaan.
- Senatarada waxay soo jeediyaan arrin kasta oo u baahan in laga doodo ama la baaro xitaa haddii ay ka kaxsan tahay qorsheyaasha Xukuumadda ee ku aaddan xeer-dejinta Dalka.

## **KAALINTA METELAADDA**

- Xubnaha Senatarada waxay metelaan qaybaha kala gedisan ee Ummadda Somaaliyeed ee ku dhaqan Gobollada Dalka waxayna ka kooban yihiin rag iyo dumar laga soo doortay Gobolladaas.
- Senataradu waxay diiradda saaraan saameynta shuruucda iyo siyaasadaha Xukuumadda Federaalka ay ku leeyihiin danaha Dowlad Goboleedyada iyo in la hubiyo in danaha Dowlad Goboleedyada la tixgeliyay.
- Senataradu waxay, marka loo baahdo, kormeer shaqo ku tegaan xafiisiyada adeegga dadweynaha iyo meel kasta oo ay cabasho ka soo gaarto; si loo xaqiijiyo in bulshada loogu adeegayo si hufan oo caddaalad ah.

## **XEER HOOSAADKA GOLAJA AQALKA SARE:**

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya marka uu gudanayo waajibaadkiisa wuxuu u hoggaansamaa Dastuurka Federaalka KMG ah iyo Xeer Hoosaadkiisa. Sharciyadda howlaha uu qabanayo Goluhu waxay ka imaaneysaa qodobada dastuuriga ah iyo qodobada xeer hoosaadka.

Haddaba, Xeer Hoosaadku sida ka muuqata magaca waa xeer uu gole

kasta oo baarlamaan ku maareeyo arrimihiiisa gudaha sida maqaamka hey'adeed, hoggaanka baarlamaanka, waajibaadka iyo xuquuqda Senatarada, guddiyada Golaha iyo waajibaadkooda, habraacyada howlaha xeer dejineed, baariseed, iyo metelaadba, arrimaha maamulka iyo shaqaalaha Golaha. Golaha Guud ayaana ansixiyay Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare 11 Abriil 2017 wuxuuna ka kooban yahay 98 qodob.

## **HABRAACA XEER DEJINEED**

Si kala madaxbannaan ama wadahir ah, Senatarada Golaha Aqalka Sare iyo Xubnaha Golaha Shacabka ayaa daraaseeya hindise-sharchiyeedyada iyaga oo ku biiranaayo aragtidooda iyo talooiyinkooda; si loo soo saaro xeerarka lagu dhaqmi karo oo ka jawaabaya baahida Dalka. Dhab ahaantii, inta badan doodaha joogtada ah ee Goleyaasha Baarlamaanka iyo shaqada ugu badan ee Guddiyada waxay ku saabsan tahay ka baaraandegidda xeerarka, ka tarjumidda ra'yiga dadka ay metelaan, samaynta cilmi baaris qoto dheer, la tashiga dhinacyada uu khuseeyo arrinka, dhageysiga dadweynaha, doodda iyo dib-u-eegista shuruucda Dowladda iyo tixgelinta faa'idooyinka ku jira ama caqabadaha ka dhalan kara arrimaha xeer-dejineed ee la hor keeno.

Hindise-sharchiyeed kasta waa in uu maraa akhrin seddex jeer ah, sidoo kalena, ay u meel mariyaan si kala madaxbanaan Golaha Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka inta uusan saxiixin Maxdaxweynaha Jamhuuriyadda si looga dhigo sharci dhaqangal ah. Habkaan wuxuu suurtogelinaya in la hubiyo in shuruucdu soo maren ka baaraandegid ku filan iyo in dhamaan dhinacyada uu khuseeyo ay helaan fursad ay ku mujiyaan aragtidooda.

## **SIDEE HINDISE-SHARCIYEED SHARCI KU NOQDA?**

Meel marinta 1aad waxa ay ka billaab kartaa Aqalka Sare ama Golaha Shacabka. Haddaba, habraaca meel marinta xeerarka ee Labada Gole waa isku mid wuxuuna maraa seddex jeer akhris:-

1. Akhrinta Koowaad: Waxaa akhrinaysa ciddii keentay hindise-sharchiyeedka,
2. Akhrinta Labaad oo ah xiliga soo jeedinta warbixinta Guddiga u xiilsaaran iyo doodda Golaha.
3. Akhrinta Seddexaad oo ah akhrinta nuqulka hindise-sharchiyeedka oo dhammaystiran oo ay ku jirto talo soo jeedintii xubnaha Aqalka Sare, waxaa akhrinaya Guddiga ay howshiisu la xiriirto hindise sharchiyeedkaas, waana loo codeynayaa.

Ugu dambeytii, nuqulka ugu dambeeyaa oo ay wada ansixiyaan labada gole ayaa loo gudbiyaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda; si uu u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

U GUDBINTA HINDISE SHARCIYEEDKA GOLAH 1<sup>AAD</sup> (AQALKA SARE AMA GOLAH SHACABKA)

AKHRINTA 1<sup>AAD</sup>

AKHRINTA 2<sup>AAD</sup>

AKHRINTA 3<sup>AAD</sup>

U GUDBINTA GOLAH KALE

AKHRINTA 1<sup>AAD</sup>

AKHRINTA 2<sup>AAD</sup>

AKHRINTA 3<sup>AAD</sup>

OGGOLAANSHABA MADAXWEYNHA

FAAFINTA RASMICA

# 2

## SENATARADA

### XOGTA SENA-TARADA

Golaha Aqalka Sare waxay ka kooban yihiiin 54 Senatar. Xogta Senatarada oo faahfaahsan waxaa laga helayaa boggo rasmiga ah ee Goluhu ku leeyahay mareegta caalamiga ah (the Internet) gaar ahaan bogga Senate.gov.so

Halkaan waxaan si kooban ugu tilmaaman xogta Sanatarada:

#### 1. Xagga Jinsiga

41 senatar waa rag halka 13-ka kale ay yihiiin haween.

#### 2. Xagga Da'da

Xubnaha Senatarada ee da'doodu u dhaxeyso 25 - 40 waa 11 Xubnood;

Xubnaha Senatarada ee da'doodu ay weyn tahay 40 waa 43 Xubnood.

#### 3. Xagga Waxbarashada:

19% Dugsiga Sare

59% Heerka Koowaad

15% Master Degree,

7% PHD.

#### 4. Xagga Khibradda

31% Xildhibaanno Hore

69% Xildhibaanno Cusub

### SIDA LOO SOO DOORTAY SENATARADA

Senatarada Golaha Aqalka Sare waxaa soo doortay goleyaasha xeer dejinta ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka marka laga reebo Senatarada metelaya Gobollada Waqooyi oo ay doorteen ergo. Doorashada xubnaha Golaha Aqalka Sare waxay ka billaabatay Dowlad Goboleedka Galmudug halkaas oo lagu doortay Senatarkii ugu horreeyay Sen. Abshir Maxamed Axmed 15 Oktoobar 2016. Markii ay soo gebagebowday doorashadooda, Senatarada waxaa xilka Senatarnimo loo dhaariiyay 28kii Diseembar 2016.



## DEEGAAN DOOROSHOYINKA SENATARADA

Aqalka Sare wuxuu uu ka kooban yahay 54 kursi oo ka kala yimid Dowlad Goboleedyada iyo Gobollada Waqooyi:

DEEGAAN DOORASHADA	TIRADA SENATARADA	BOQOLEYDA
Puntland	11	20%
Gobollada Waqooyi	11	20%
Galmudug	8	15%
Hirshabeelle	8	15%
Koonfur Galbeed	8	15%
Jubbaland	8	15%
Tirada Guud	54	100%

## METELAADDA SHACABKA DEEGAAN DOOROSHOYINKA

Waxaa jiray booqoshooyin ay ku tageen Senatarada deegaan doorashooyinkooda; si ay ugu kuurgalaan xaaladaha iyo duruufaha ka jira Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

Senataradu waxay booqashooyinka deegaan doorasho ku tageen xarumaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka sida Puntland, Hirshabeelle, Galmudug, Jubaland, iyo Koonfur Galbeed iyaga oo ka soo uruuriyay xog ku saabsan xaaladda nololeed, siyaasadeed, amni, iyo mid dhaqaaleba, waxayna Golaha Guud la wadaageen warbixinno ku saabsan arrimaha kor ku xusan.

Senatarrada, iyaga oo gudanaaya kaalintooda u adeegidda shacabka deegaan doorashooyinka laga soo doortay, waxay u ololeeyeen danaha Shacabka ay metelaan; Senataradu waxay soo jeediyeen arrimo badan oo ay aheyd in wax laga qabto, sida u gurmashada dadka ay saameeyeen fatahaadaha iyo daadadka ka dhacday Hirshabeelle, Jubaland, Puntland iyo Gobollada Waqooyi, joojinta colaadaha, xoojinta xiriirkha Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada, xal u raadinta khilaafka labada heer dowladeed, joojinta darbiga ay Dowladda Kenya ka dhiseysay xuduudda

Soomaaliya, waxayna hordhigeen arrimahaas iyo kuwo kaleba Golaha Guud, Goluhuna wuxuu ka qaataay tallaabooyin wax ku ool ah oo wax laga qabtay dhammaan arrimahaas.

Ugu dambeyntii, Senatarada Golaha Aqalka Sare waxay tusaale u noqdeen metelaadda looga baahan yahay xubnaha gole baarlamaan, waxayna la yimaadeen wax qabad muuqdo oo ay ku biirinayaan horumarinta iyo gacan siinta deegaan doorashooyinkooda. Waxaa tusaale lagu dayan karo noqday hal abuurkii uu Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka Sare Sen. Abshir Maxamed Axmed kaga furay maktabad guud Magaalada Cadaado ee Dowlad Goboleedka Galmudug.

## GUDDOONKA GOLAJA AQALKAA SARE



Sen. Abdi Hashi Abdullahi  
**Gudooniye Ku Xigeenka 1aad**




Sen. Abshir Mohamed Ahmed  
**Gudooniye Ku Xigeenka 1aad**



Sen. Mowlaid Hussein Guhaad  
**Gudooniye Ku Xigeenka 2aad**


## HABDHOWREYAA SHA GOLAJA AQALKAA SARE



Sen. Abdikafi Mo'alim Hassan  
**Habdhowraha Golaha**




Sen. Fartun Abdulkadir farah  
**Ku Xigeenka Habdhowraha**




Sen. Botan Barre Samatar  
Puntland




Sen. Zamzam Ibrahim Ali  
Koonfur Galbeed




Sen. Abdikarim  
Mohamed Hassan  
Gobollada Waqooyi




Sen. Abdirahman  
Mohamed Mohamud  
Puntland




Sen. Abdirisaq Ahmed  
Ali  
Gobollada Waqooyi



Sen. Abdirisaq Osman  
Hassan (Jurille)  
Puntland




Sen. Abdisalam Hagi  
Mohamud Dhere  
Puntland



Sen. Abdiwahid Elmi  
Omer  
Galmudug




Sen. Abdullaahi Sheikh  
Ismail  
Jubbaland




Sen. Osman Ahmed  
Ma'ow  
Hirshabeelle




Sen. Deqa Hassan  
Hussein  
Cobollada Waqooyi



Sen. Osman Mohamud  
Dufle  
Hirshabeelle



Sen. Abdi Ahmed  
Dhuhulow  
Galmudug




Sen. Abdi Hassan Awale  
Galmudug




Sen. Timiro Mohamed Ali  
Koonfur Galbeed



Sen. Abdullaahi Abdi  
Garun  
Koonfur Galbeed



Sen. Ahmed Abdihafid  
Mohamed  
Jubbaland




Sen. Abukar Ahmed  
Hashi  
Galmudug



Sen. Adan Abdi Adan  
Koonfur Galbeed




Sen. Ayub Ismail Yusuf  
Gobollada Waqooyi



Sen. Ahmed Hashi  
Maxamud  
Jubbaland



Sen. Ahmed Moallim  
Omer Ahmed  
Jubbaland



Sen. Bilal Idris Abdil-лаahi  
Gobollada Waqooyi



Sen. Fatima Hassan Adan  
Jubbaland



Sen. Farhan Ali Hussein  
Puntland



Sen. Hussein Ali Hagi  
Abdalla  
Koonfur Galbeed



Sen. Ilyas Ali Hassan  
Koonfur Galbeed



Sen. Hodan Mohamud  
Osman  
Puntland



Sen. Iftiin Hassan Iman  
Jubbaland



Sen. Mohamed Amin  
Sheikh Osman  
Hirshabeelle



Sen. Hussein Sheikh  
Mohamud  
Koonfur Galbeed



Sen. Mahdi Dahir Sheikh  
Nur  
Puntland



Sen. Mohamed Osman  
Farah  
Hirshabeelle



Sen. Jawahir Ahmed  
Elmi  
Galmudug




Sen. Muse Sudi Yalahow  
Hirshabeelle



Sen. Muno Omar Hassan  
Gobollada Waqooyi



Sen. Shukri Aden  
Mohamed  
Puntland




Sen. Mohamed Hussein  
Rage  
Hirshabeele



Sen. Omar Abdirashid Ali  
Sharmarke  
Puntland



Sen. Mohamud Ahmed  
Mohamud  
Puntland




Sen. Yusuf Gelle Ugas  
Galmudug




Sen. Hassan Farah Hujale  
Jubaland



Sen. Zamzam Dahir  
Mohamud  
Galmudug



Sen. Saed Abdi Hussein  
Gobollada Waqooyi



Sen. Mustaf Mohamed  
Qodah  
Gobollada Waqooyi



Sen. Noro Farah Jama  
Cobollada Waqooyi



Sen. Saido Hassan  
Osman  
Puntland



Sen. Muhudin Sh. Ali  
Jama  
Cobollada Waqooyi



Sen. Naimo Ibrahim  
Yusuf  
Hirshabelle

# 3

## **WAXQABADKA GOLAHA AQALKA SARE**

Golaha Aqalka Sare wuxuu kaalin xeer dejineed ku leeyahay dhammaan shuruucda Dalka oo ay ku jirto miisaaniyadda Qaranka iyo wax ka beddelkooda. Sidoo kale, Goluhu wuxuu korjoogteeyaa siyaasadaha guud ee Qaranka iyo hirgelinta guud ee shuruucda. Goluhu wuxuu ansixiyaa xubnaha dastuuriga ee ku qeexan Dastuurka KMG ah. Haddaba, Golaha wuxuu kaalinta kor ku xusan u gutaa si waafaqsan Dastuurka KMG ah iyo Xeer Hoosaadka Aqalka wuxuuna kaga howlgalaa arrimaha la soo hordhigo labo heer:

- Fadhiga Golaha Guud (Plenary session/meeting)
- Fadhiyada Guddiyada Golaha (Committee Meetings)

### **FADHIGA GUUD EE GOLAHA**

Fadhiga Guud ee Golaha Aqalka Sare waa meesha lagu falanqeeyo loogana doodo arrimaha Qaranka, arrimaha khuseeyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo shuruucda Federaalka. Hindise sharchiyeed kasta ama wax ka beddel sharci hore ee soo maray Golaha Shacabka waa in uu soo maraa Golaha Aqalka Sare ka hor inta aan loo gudbinin Madaxweynaha Jamhuuriyadda. Aqalku wuxuu awood u leeyahay in uu ka qaado hindise sharchiyeedka kasta ama wax ka beddel sharci hore seddex tallaabo: in uu sidiisa ku ansixiyo, in uu diido, iyo in uu wax ka beddel ku sameeyo hindise sharchiyeedkaas ama wax ka beddelka la soo jeediyay.

### **HABRAACA MEEL MARINTA SHURUUCDA**

Hindise-sharchiyeedyada la hor keeno Golaha Aqalka Sare waxay maraan seddex marxaladood ka hor inta uusan go'aan ka gaarin Golaha, waxayna kala yihiin: -



1	AKHRINTA <sup>1AAD</sup>
2	AKHRINTA <sup>2AAD</sup>
3	AKHRINTA <sup>3AAD</sup>

## SIDA AJENDAHA GOLAH GUUD LOO SAMEEYO

Guddiga Joogtada ah ee Goluhu wuxuu diyaariyaa ajendaha fadhiyada soo socda ee Golaha Guud, waxaana loo qeybinayaa xubanaha Golaha ugu yaraan 12 saacadood ka hor fadhiga loo dhan yahay.

Ajendaha kulan walba waxaa lagu ansixinayaa cod gacan taag ah, haddii aysan ugu yaraan shan xubnood bilowga fadhiga u gudbinin Guddoomiyaha Golaha soo jeedin qoraal ah oo wax lagaga beddelaayo ajendaha iyaga oo soo jeedinayo arrin deg deg ah, soo jeedintuna waa in ay ku saxiixan yihin xubnaha taageeraya, ama shan xubnood ayaa soo jeedineyso in wax laga beddelo ama wax lagu daro ajendaha isla fadhigaas haddii ay sidaas u codeeyaan (50% + 1) ee tirada guud ee xubnaha fadhiya kulanka.

## WAX QABADKA GOLAH GUUD

Golaha Guud waxaa u qabsoomay arrimaha hoos ku qoran:

- Wuxuu ansixiyay hindise-sharchiyeedyada kala ah:
  - Xeerka Dhowridda Gobonnimada iyo Midnimada Gayiga Soomaaliyeed.
  - Xeerka Kheyraadka Biyaha & Dhismaha Hay'adda Maareynta Biyaha Qaranka.
  - Xeerka Dhismaha Guddiyada Madaxa Bannaan ee la dagaallanka musuq maasuqa ee labada heer.
  - Xeerka Dhismaha Hay'adda Naafada Qaranka.
- Wuxuu ansixiyay qaraarada soo socdo: -
  - A. Qaraarka Oggolaanshaha Dhismaha Guddiga Baarista iyo Dabagalka weerarkii

lagu qaaday hoyga Senator Cabdi Xasan Cawaale (Qaybdiid).

- B. Qaraarka Hannaanka Maamulidda Arrimaha Xajka & Cumrada.
- C. Qaraarka Ansixinta Xeerka Dhowridda Gobonnimada iyo Midnimada Gayiga Soomaaliyeed.
- D. Qaraarka Ansixinta Xeerka Kheyraadka Biyaha & Dhismaha Hay'adda Maareynta Biyaha Qaranka.
- E. Qaraarka Ansixinta Xeerka Dhismaha Guddiyada Madaxa Bannaan ee la dagaallanka musuq maasuqa ee labada heer.
- F. Qaraarka Ansixinta Xeerka Dhismaha Hay'adda Naafada Qaranka.
- G. Qaraarka Dhismaha Guddiga Gurmadka Fat-ahaadaha ee Golaha Aqalka Sare.
- H. Qaraarka U Diridda Guddiyo Gaar ah dhammaan Dowladaha Xubinaha ka ah Dowladda Federaalka si ay ugu kuurgalaan tabashooyinkooda.
- I. Qaraarka Ogolaanshaha in Golaha Aqalka Sare bixiyo taakulo lacageed oo dhan \$50,000 si loogu bixiyo

- gurmadka dadka ay saameeyeen fatahaadaha iyada oo markii dambe lagu kordhiyay lacagtaas \$50,000 kale.
- Wuxuu warbixinno ka dhageystay su'aalana weydiiyay hay'ado ka tirsan Dowlaadda Federaalka, kuwaas oo kala ah: -
  - Safiirka Soomaaliya u fadhiya Midowga Yurub, Mudane Dr. Cali Saciid Fiqi.
  - Wasiirka Wasaaradda Korontada iyo Biyaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Saalim Caliyow Ibrow.
  - Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xasan Xuseen Xaaji.
  - Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda Iyo Iskaashiga Caalamiga, Mudane Axmed Ciise Cawad.
  - Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha, Mudane Cusmaan Libaax Ibraahim.
  - Wasiirka Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, Marwo Deeqa Yaasiin Xaaji Yuusuf.
  - Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Mudane Maxamed Axmed Jimcaale.
  - Guddiga Dib u eegista iyo La Socodka Hirgelinta Dastuurka
4. Wuxuu dood gaar ah ka yeeshay xaalad ka taaganeyd xudduudda ay la leedahay Degmada Beledxaawo Dalka Kenya iyo dhismaha darbiga.

Lr.	WAXQABADKA	TIRADA GUUD
1.	Kulamada Golaha Guud	23 Kulan
2.	Saacadaha shaqo	32 Saac iyo 57 Daqiiqo
3	Warbixinnada la horgeeyay	13 Warbixin
4	Nuxurrada laga dooday (Agenda Items)	33 Nuxur
5	Tirada dadka horyimid (Witnesses)	11 Ruux
6	Shuruucda la ansixiyay	4 sharci
7	Shuruucda hortaalla	2 sharci

## JADWALKII SHAQO EE 2018 (CALENDAR)

JANUARY						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30	31				

FEBRUARY						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28				

MARCH						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

APRIL						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
			1			
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29
30						

MAY						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
		1	2	3	4	5
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30	31			

JUNE						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
		1	2	3		
4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17
18	19	20	21	22	23	24
25	26	27	28	29	30	

JULY						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
		1				
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29
30	31					

AUGUST						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
	1	2	3	4	5	
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30	31		

SEPTEMBER						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
		1	2			
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

OCTOBER						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30	31				

NOVEMBER						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
	1	2	3	4		
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30		

DECEMBER						
MON	TUE	WED	THU	FRI	SAT	SUN
		1				
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30
31						

## SIDA LOO FARIISTO GOLAHA GUUD

**Guddoonka**

**Masraxa**

**Xogheynta Guud &  
Habdhowrka**

**Senatarada**

**Saxaaafada**

**Saxaaafada**

**Howl-  
wadeenadda**

Sida ka muuqato jaantuska, habka uu u fariisto Golaha Aqalka Sare waa sidatan soo socto: qeypta are ee soo jeedka waxaa fariista Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare iyo Ku Xigeennadiisa, Guddoomiyaha Golaha ayaa kursiga bartanka ah fariista halka midigtiiisa uu fariisto Guddoomiyaha Ku Xigeenka Kowaad, dhanka bidixna waxaa fariista Guddoomiyaha ku-Xigeenka Labaad. Masraxa qeybtiiisa hoose waxaa fariista habdhowreyaasha iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare.

Qeypta dhexe waxaa fariista Xubnaha Senatarada Golaha Aqalka Sare halka bidixda iyo midigtana ay fariistaan warbaahinta, safka ugu dambeeyaa waxaa fariista hawladeennada Golaha Aqalka Sare.



# RAAD-RAACA SHRUUCDII LA HORKEENAY

## GOLAHA AQALKA SARE

27

Laga soo billaabo markii la dhisay Golaha Aqalka Sare waxaa la horkeenay hindise sharchiyeedyada soo socdo wuxuuna uga gutay waajibkiisa sida soo socoto:

<b>Magaca Sharciga</b>	<b>Cidda Keentay</b>	<b>Lr.</b>	<b>Tar. La Soo Gudbiyay</b>	<b>Akhrinta 1aad</b>	<b>Akhrinta 2aad</b>	<b>Akhrinta 3aad</b>	<b>Faahfaahin</b>	<b>Tar. Loo Gudbiyay Golaha Shacabka</b>	<b>Saxiixa Madax-weynaha</b>
Hindisaha Sharciga Isgaarsiinta Qaranka	Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta	01	12.8.17	19.8.17	20.8.17	21.8.17	La ansixiyay 21.08.17	La gudbiyay 13.09.2017	Saxiixay 02.10.2017
Hindisaha Sharciga Kheyraadka Biyaha	Wasaaradda Tamarta & Kheyraadka Biyaha	02	21.11.17	24.03.18	24.10.18	31.10.18	La ansixiyay 31.10.18	La gudbiyay 05.11.2018	
Hindisaha Sharciga Dhisimaha Guddiyada Madaxa Bannaan ee La Dagaallanka Musuq Maasuqa ee Labada Heer	Wasaaradda Caddaaladda	03	28.11.17	23.04.18	26.11.18	05.12.18	La Ansixiyay 05.12.18	La gudbiyay 06.12.2018	
Hindisaha Seerka Dhowridda Gobonn-imada & Midnimada Gayiga Soomaaliyeed	Golaha Shacbiga	04	12.03.18	13.03.18	14.03.18	15.03.18	La ansixiyay 15.03.18	La gudbiyay 19.03.2018	
Hindisaha Sharciga Dhismaha Hay'adda Naafada Qaranka	Wasaaradda Xuquuqul Insaanka	05	27.11.18	06.12.18	12.12.18	12.12.18	La ansixiyay 12.12.18	La gudbiyay 12.12.2018	Saxiixay 31.12.2018
Hindisaha Golaha Mihnadleyasha Caafimaadka Qaranka	Wasaaradda Caafimaadka	06	12.12.18						
Hindisaha Wax Ka Beddelka Sharciga Xuquuqda Siyaasiyiinta Dowladda	Golaha Shacabka	07	29.12.18						

## SHRUURCDA KU SOO WAJAHAN GOLAHA AQALKA SARE

<b>Lr.</b>	<b>Magaca Sharciga</b>	<b>Hay'adda Keeneyso</b>
1.	Hindise sharchiyeedka Patroolka	Wasaaradda Batroolka
2.	Maamulka Maaliyadda (PFM)	Wasaaradda Maaliyadda
3.	La-dagaallanka Argagaxisada	Wasaaradda Amniga Gudaha
4.	Hindise-sharchiyeedka Waxbarashada Soomaaliya	Wasaaradda Waxbarashada
5.	Hindise-sharchiyeedka Xakamaynta Hubka Wax Dila	Wasaaradda Amniga Gudaha
6.	Hindise-sharchiyeedka Istaatistikida (Tiro Koobka) Soomaaliyeed	Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha
7.	La-dagaallanka Argagaxisada	Wasaaradda Amniga Gudaha
8.	Dib-u-eegista Sharciga Xaq-siinta Ciidamada Qalabka Sida	Golaha Shacabka
9.	Shuruuc kale oo la filaayo in la soo gudbiyo sida Sharciga Doora-shooyinka Sharciga	Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Federaalka

## GUDDIYADA GOLAHA AQALKA SARE

Guddiyada Baarlamaaniga ah waa halbowlaha socodsiiya howlaha xeer dejinta ee Baarlamaannada, waana halka looga baaraandego laguna turxaan bixiyo dhammaan howlaha uu qabto gole baarlamaan.

Marka la joogo Guddiyada, Senataradu waxay daraasad qoto dheer ku sameeyaan hindise-sharchiyeedyada loo soo gudbiyay ama uu curiyay Golaha, sameeyaan baaritaanno iyo daraasado gaar ah, waxayna dib u eegis ku sameeyaan miisaaniyadda Qaranka.

Marka dib-u-eegis lagu sameeynayo hindise-sharchiyeedyada, xubnaha Guddiga waxay dhageystaan dadweynaha iyo cid allaale ciddii uu khuseeyo hindise sharchiyeedka, markaa ka dib, Guddigu wuxuu ugu codeeyaa qodob qodob.

Guddiyadu, iyaga oo ku sameynaya baaritaanno arrimo gaar ah, waxay gacan ka geystaan ifinta baahiyaha bulsho, kuwa dhaqaale iyo kuwa siyaasadeed. Guddiyada ayaa sidoo kale siiya xubnooda fursado gaar ah oo ay ku dhageystaan warbixinno gaar ah oo ka imaanaya dadweynaha, saraakiisha Dowladda, wakiilo ururada kala geddisan, iyo khubarro iyaga oo uga warrama Guddiga arrinta ay markaas Guddigu gacanta ku hayaan. Sidoo kale, waxaa u furan muwaadiniinta iyo hay'adaha kala duwan in ay horyimaadaan Guddiyada Golaha si ay warbixin gaar ah u siyyaan.

Iyada oo la adeegsanayo awoddha gaar ahaaneed ee Goluhu u leeyahay ilaalinta danaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo

dadka aan metelaadda laheyn ama laga tiro badan yahay, Guddiyada Goluhu waxay dhageystaan dadka aan fursadda u helin in codkooda la maqlo, waxaana la siiyaa waqtii ay kaga doodaan shariyada iyo siyaasadaha saameynta ku leh.

## QAAB-DHISMEEDKA GUDDIYADA

Guud ahaan, Xubnaha Guddiyada waxay u dhaxeeyaa 4 ilaa 6 Senatar. Guddoomiyaha Guddi walba waxaa soo dooranaya xubnaha Guddiga, wuxuuna mas'uul ka yahay maamulka iyo guddoominta shirarka Guddiga, ilaalinta nidaamka, kormeerka miisaaniyadda Guddiga, isaga kaliya ayaana ku hadli kara magaca Guddiga.

## NOOCYADA GUDDIYADA GOLAHA AQALKA SARE

Golaha Aqalka Sare waxaa uu leeyahay 3 nooc oo guddiyo ah, kuwaas oo kala ah:

**1. Guddiyo Joogto ah:** Waa guddiyada u dhisan sida joogtada ah una xilsaaran arrimo kala duwan oo la xiriira siyaasadda, la xisaabtanka Xukuumadda Federaalka iyo shuruucda Dalka, sida: Difaaca, Garsoorka, Arrimaha Gudaha, Dibedda, Dhaqaalaha, Ganacsiga, Kheyraadka IWM.

**2. Guddiyo Gaar ah:** waa guddiyo si ku meel gaar ah uu Goluhu u dhiso si ay u sameeyaan daraasad ku saabsan mowduuc gaar ah ama qabanaya howl gaar ah, jirayana waqtii xaddidan kadibna ay soo idlaanayso shaqadoodu.

**3. Guddiyo isku-dhafan:** (Gaar ama Joogto) guddiyadaan waxaa ku mideysan Xubnaha Labada Gole ee Baaralamaanka Federaalka, kuwaas oo u xilsaaran arrimaha sida wadajirka ah ay uga shaqeynayaan Labada Gole.

## XUBNAHA GUDDIYADA IYO SIDA LOO SOO XULAY

Golaha Aqalka Sare wuxuu leeyahay tobantun guddi hoosaad oo joogto ah iyo hal urur haween baarlamaan. Mid kastaa oo ka mid ah guddiyadaan wuxuu u qeybsan yahay arrimo gaar ah; si howlaha Golaha ay ugu socdaan si habsami leh. Magacyada xubnaha guddiyada waxaad ka heli kartaa Lifaaqa B.

Marka laga reebo Guddiga Joogtada ah iyo Ururka Haweenka Baarlamaanka, guddi kasta wuxuu ka kooban yahay afar ilaa lix xubnood oo laga soo kala doortay shanta Dowlad Goboleed iyo Gobollada Waqooyi. Guddiyada Golaha waxay u qeybsan yihiin sida hoos ku qoran iyada oo guddi kasta uu u xilsaaran yahay arrimaha soo socdo:

### Guddiga Joogtada ah ee Golaha Aqalka Sare

Guddiga Joogtada waa guddiga kala socodsiiya howlaha Golaha waxa uuna ka arrimiyyaa dhammaan arrimaha maamul ee Golaha, arrimaha siyaasadeed, iyo ajendeyaasha Golaha Guud. Guddiga wuxuu ka doodaa arrimaha la horkeeno ee ku qoran ajendihiisa rasmiga ah. Guddigu wuxuu go'aannadiisa ku soo saaraa tiro hal dheeri ah xubnaha kulanku ku guntamo.

### Guddiga Garsoorka, Arrimaha Diinta & Awqaafta, Xuquuqlu Insaanka, Haweenka iyo Carruurta

Guddigan wuxuu u qaabilsan yahay Golaha Aqalka Sare siyaasadaha, la xisaabtanka Xukuumadda, iyo shuruucda ee la xiriira garsoorka, arrimaha diinta & awqaafta, xuquuqlu insaanka, haweenka iyo carruurta.

### Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabeyaasha Dhaqaalaha & Gaadiidka

Guddigan wuxuu u qaabilsan yahay Golaha Aqalka Sare siyaasadaha, la xisaabtanka Xukuumadda, iyo shuruucda ee la xiriira kheyraadka qaranka, kaabeyaasha dhaqaalaha & gaadiidka.

## Guddiga Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta iyo Xiriirka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka

Guddigan wuxuu u qaabilسان ياهay Golaha Aqalka Sare siyaasadaha, la xisaabtanka Xukuumadda, iyo shuruucda ee la xiriira arrimaha gudaha, dib-u-heshiisiinta iyo xiriirka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

## Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada, Arrimaha bani'aadannimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka

Guddigan wuxuu u qaabilسان ياهay Golaha Aqalka Sare siyaasadaha, la xisaabtanka Xukuumadda, iyo shuruucda ee la xiriira horumarinta adeegga bulshada, arrimaha bani'aadannimada, warfaafinta iyo dhaqanka.

## Guddiga Amniga iyo Difaaca

Guddigan wuxuu u qaabilسان ياهay Golaha Aqalka Sare siyaasadaha, la xisaabtanka Xukuumadda, iyo shuruucda ee la xiriira amniga iyo difaaca Qaranka.

## Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska

Guddigan wuxuu u qaabilسان ياهay Golaha Aqalka Sare siyaasadaha, la xisaabtanka Xukuumadda, iyo shuruucda ee la xiriira dhaqaalaha, maaliyadda, ganacsiga, warshadaha, isgaarsiinta iyo dalxiiska.

## Guddiga La Socodka Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (Aqalka Sare)

Guddigan wuxuu u qaabilسان ياهay Golaha Aqalka Sare siyaasadaha, la xisaabtanka Xukuumadda, iyo hindiseyaasha sharci ee la xiriira dib-u-eegista iyo la socodka hirgelinta dastuurka.

## Guddiga Arrimaha Dibedda Qorsheynta, maalgashiga iyo iskaashiga Caalamiga ah:

Guddigan wuxuu u qaabilسان ياهay Golaha Aqalka Sare siyaasadaha, la xisaabtanka Xukuumadda, iyo hindiseyaasha sharci ee la xiriira arrimaha dibedda, qorsheynta Qaranka, maalgashiga iyo iskaashiga caalamiga ah.



## Guddiga Xeer Hoosaadka, Anshaxa, Xasaanadda iyo Daryeelka Senatarada

Guddigan waa ka duwan yahay guddiyada kale ee Golaha wuxuuna u qaabilan yahay Golaha Aqalka Sare arrimaha gudaha ee kala ah xeer hoosaadka, anshaxa, xasaanadda iyo daryeelka Senatarada.

## Ururka Haweenka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya – Golaha Aqalka Sare

Guddigan wuxuu u qaabilan yahay Golaha Aqalka Sare horumarinta haweenka iyo u ooleynta xuquuqdooda.

### **WAXQABADKA GUDDIYADA**

Guddiyada Golaha Aqalka Sare waxay u howlgaleen si mas'uuliyad ku dheehan tahay iyaga oo muujiyay howl karnimo iyo wax qabad dhab ah, waxaan u qabsoomay howlaha soo socdo:

Lr.	Waxqabadka	Tirada Guud
1.	Kulamada	116 Kulan
2.	Saacadaha shaqo (kulamada kaliya)	231 Saac
3.	Warbixinnada la diyaariyay	27 Warbixin
4.	Warbixinnada la soo gudbiyay	23 Warbixin
5.	Nuxurrada laga dooday (Agenda Items)	124 Nuxur
6.	Tirada dadka horyimid (Witnesses)	111 Ruux
7.	Shuruucda laga shaqeeyay	3 Sharci

# 4

## **METELAADDA DOWLADAH XUBNA-HA KA AH DOWLADDA FEDERAALKA**

Golaha Aqalka Sare waxaa loo igmaday metelaadda danaha Dowlad Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka; si taas loo xaqiijiyo, Goluhu wuxuu xiriir dhow la leeyahay dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka. Sannadkii 2018 Goluhu wuxuu wufuud kala duwan u diray Dowladahaas iyaga oo ka qeybgalayey kulamo ka dhacayay dowlad goboleedyada ama ku tegay booqashooyin shaqo.

### **XAL U HELIDDA KHILAAFKA U DHEXEYAY DOWLADDA FEDERAALKA IYO DOWLAD GOBOLEEDYADA**



Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu si dhow u la socday khilaafka soo noq-noqday ee u dhexeeyay laanta fulinta ee Dowladda Federaalka iyo laamaha fulinta ee Dowlo Goboleedyada, wuxuuna walaac xooggan ka qabay in haddii uu sii socdo khilaafkaas uu dhaawac xooggan gaarsiin karo geedi-socodka dib u dhiska Dowladnimada Soomaaliya.

Golaha Aqalka Sare ee BFS, isaga oo ka fal-celinaya war-murtiyeedkii kasoo baxay shirkii Golaha Iskaashiga Dowlo Goboleedyada (GIDG) ee 4 – 8 Sebteembar 2018 kana dhacay Magaalada Kismaayo, wuxuu ku oggolaaday kulan aan caadi aheyn, 15/09/2018, in la magacaabو guddiyo xaqiiqo raadin ah oo loo kala diray Shanta Dowlo Goboleedyo ee Dalka ka jirta; si ay u soo uruuriyaan xog sugaran oo dhammaystiran, iyaga oo u kuur-galayay khilaafka u dhaxeeyaa Dowladda Dhexe iyo Dowlo Goboleedyada.

Haddaba, Guddiyada Aqalka Sare waxaa ay booqashooyin shaqo ku joogeen 16 – 22 Sebteembar 2018 Dowlo Goboleedyada, waxaa ayna dib u soo laabteen 23 Sebteembar 2018, iyaga oo soo gudbiyay warbixinno taabanaya xaaladda guud ee Dowlad Goboleedyada iyo arrimaha khilaafku ka taagan yahay.

Wufuudda iyagoo gudanaya xilka dastuuriga ah ee Golaha Aqalka Sare sida ku cad Qod. 61aad (1) (3) ee Dastuurka KMG ah, waxaa ay kala hadleen Dowlad Goboleedyada in Golaha Aqalka Sare uu u istaagayo dhex-dhexaadinta khilaafka soo noqnoqday ee u dhaxeeyaa Dowladda Federaalka iyo Dowlo Goboleedyada.

Madaxda laamaha fulinta ee Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDF) waxaa ay kalsooni buuxdo siiyeen in Golaha Aqalka Sare uu qaato kaalinta dhix-dhexaadinta khilaafka, iyaga oo ku war-geliyay wufuudda Aqalka in ay diyaar u yihiin wada-hadal dhab ah oo laga yeesho dhammaan arrimaha la isku hayay.

Sidaas darteed, Golaha Aqalka Sare wuxuu guddoonsaday in uu kulan xogwareysi ah kala yeesho Dowladda Dhexe arrimaha ay ka tabanayaan

Dowlad Goboleedyada iyo sida ugu habboon ee loo dar-dar gelin karo wada hadalka labada dhinac.

Golaha Aqalka Sare wuxuu 29 Sept. 2018 magacaabay guddi gaar ah oo xogwareysi kala yeesho Xukuumadda Federaalka tabashooyinka ay soo gudbiyeen DXDF iyo aragtidooda ku aaddan khilaafka u dhaxeeyaa labada heer maamul.

Guddiga la magacaabay waxa uu ka koobnaa xubnaha hoos ku xusan:

1. Sen. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud “Farole”, Guddoomiye
2. Sen. Cabdullaahi Sheekh Ismaciil “Fartaag”, Xubin
3. Sen. Maxamed Xuseen Raage, Xubin
4. Sen. Cabdullahi Cabdi Garuun, Xubin
5. Sen. Cabdi Axmed Dhuxulow, Xubin
6. Sen. Mustafa Maxamuud Qodax, Xubin
7. Sen. Zamzam Ibrahim Cali, Xubin
8. Sen. Deeqa Xasan Xuseen, Xubin

Xukuumadda Federaalka iyada oo ka jawaabeysa qoraalka rasmiga ah ee la lagu magacaabay Guddiga Xogwareysiga Xukuumadda Federaalka waxa ay soo magacowday guddi ka kooban seddex wasiir oo kala ah:

1. Md. Cabdi Maxamed Sabriye, Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka
2. Md. Cabdiraxmaan Ducaale Bayle, Wasiirka Maaliyadda
3. Md. Maxamed Abuukar Islow,

## Wasiirka Amniga Gudaha

Guddiga Xogwareysiga Xukuumadda ayaa Jimco 5ta Oct. 2018 kulankii ugu horreeyay la qaataay Guddiga Xukuumada iyada oo Guddoomiyaha Guddigu uu warbixin kooban ka siiyay dadaallada dhix dhexaadinta ah ee uu waday Golaha Aqalka Sare kuna wareejiyay warbixinta tabashoooyinka laga soo uruuriyay DXDF.

Guddiga Xukuumadda ayaa si diirran oo niyad sami ku dheehan tahay u soo dhaweeiyay dhix dhexaadinta Golaha Aqalka Sare iyaga oo ku wargeliyay Guddiga in ay la wadaagi doonaan tabashoooyinka DXDF wasiirada kale ee ay khuseyso.

Ugudambeyntii, Guddiga Xukuumadda iyo Guddiga Xogwareysiga ee Golaha waxa ay ku ballameen in Xukuumaddu ku soo gudbiso jawaabaha tabashoooyinka DXDF ugu dambeyn Isniiin 8da Oct. 2018.

Guddoomiyaha Guddiga Xogwareysiga Xukuumadda ayaa 9 Oct. 2018 kulan la qaataay Madaxweynaha Jamhuuriyadda isaga oo la socodsiiyay wixii ay ku wada hadleen labada guddi iyo in weli jawaabo laga sugayo Xukuumadda. Sidoo kale, Guddoomiyaha Guddiga waxa uu 15 Oct. 2018 warbixin siiyay Guddoonka Golaha Aqalka Sare isaga oo la socodsiiyay halka ay wax marayeen.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa kulamo gooni gooni ah la yeeshay 19 Oct. 2018 Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare iyo Guddoomiyaha Guddiga Xogwareysiga Xukuumadda. Madaxweynahu wuxuu ka ballanqaaday Guddoomiyaha Guddiga Xogwareysiga Xukuumadda in laga soo jawaabi doono tabashoooyinka DXDF.

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare iyo Guddoomiyaha Guddiga Xogwareysiga Xukuumadda ayaa 20 Oct. 2018 iska xogwareytsay waxa ay kala soo kulmeen Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxayna warbixin siyeen Guddiga Joogtada ah ee Golaha Aqalka Sare.

Guddiga Joogtada ah ee Golaha Aqalka Sare markii uu dhageystay warbixinta Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare iyo soo jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Xogwareysiga Xukuumadda waxa uu go'aamiyay in la siiyo Madaxweynaha iyo Xukuumadduba muddo seddex cisho ah oo ay ku soo gudbiyaan jawaabaha laga sugayay iyada oo go'aankaas loo gudbiyay isla maalintaas Madaxweynaha iyo Xukuumadda. (Eeg go'aanka Guddiga Joogtada ah ee tirsigiisu yahay Tix: GAS/B-10/KF4/01/18 ee 20 Oct. 2018).

Xukuumadda Federaalka ayaa muddadii seddexda cisho aheyd ku soo jawaabtay iyada oo Ra'iisul Wasaaruhu uu 22 Oct. 2018 soo magacaabay guddi wada xaajood oo ka kooban Wasiirada hoos ku xusan:

1. Md. Cabdi Maxamed Sabriye, Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka
2. Md. Cabdiraxmaan Ducaale Bayle, Wasiirka Maaliyadda
3. Md. Maxamed Abuukar Islow, Wasiirka Amniga Gudaha
4. Md. Cabdiraxmaan Xoosh Jibriil, Wasiirka Arrimaha Dastuurka

Guddigan oo u xiisaaran in ay kala shaqeeyaan Golaha Aqalka Sare sidii xal loogu heli lahaa cabashoooyinka ay soo gaarsiiyeyen Golaha Aqalka Sare qaar ka mid ah Dowladaha Xubnaha

ka ah Dowladda Federaalka. (Eeg warqadda ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaarada ee tirsigeedu yahay XRW/0678/10/2018 ee 22 Oct. 2018).

Golaha Aqalka Sare wuxuu warqad rasmi ah u qoray Golaha Iskaashiga Dowlad Goboledyada si ay u soo magacaabaan guddi heer wasiir ah oo la fariista guddiga Xukuumadda Federaalka. hase ahaatee, Golaha Iskaashiga Dowlad Goboleedyada ayaa soo saaray 29 Oct. 2018 warqad tirsigeedu yahay CIC/0021/10/2018 iyaga oo u wakiishay Golaha Aqalka Sare inuu kala hadlo Xukuumadda Dhexe sidii xal waara loogu heli lahaa khilaafka u dhaxeeyay labada heer maamul.

Guddomiyaha Aqalka Sare ayaa, 04/11/2018, magacaabay Guddiga Gaar ah oo ka koobnaa lix Senator:

1. Sen. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamud Farole (Guddomiye)
2. Sen. Cabdulaahi Sheikh Ismaacil Fartaag
3. Sen. Sacida Xasan Cusmaan
4. Sen. Cabdulaahi Cabdi Garun
5. Sen. Cabdi Axmad Dhuxulow (Dhagdheer)
6. Sen. Muxiyadiin Sheikh Cali Jaamac

Guddiga Xukuumadda ayaa 18/11/2018 kulan kula yeeshay, Xarunta Aqalka Sare, Guddiga Gaarka ah ee Aqalka Sare, ka dibna soo qoray warqadda lambar WAGF&D/XW/070/18 ee 19/11/2018. Haddaba, Guddiga Aqalka Sare ayaa go'aan ka gaaray xal-u-helidda khilaafaadka u dhaxeeyay Xukuumada DFS iyo DXDF wuxuuna soo saaray go'aankan:

[ Shir uu yeeshay, 24/11/2018,

Guddiga Gaar ah ee Aqalka Sare ee xal-u-helidda khilafka labada dhinac, wuxuu qoralkan ku soo gudbinaya, go'aan ahaan tabashooyinka loo baahan yahay in Xukuumadda Federaalka ah ay sida ugu dhaqsa badan uga hawlgasho, una fuliso wax ka qabashadiisa, si loo soo celiyo wadashaqeyntii Heyadihi Dawliga ah - Heer maamul Dhexe iyo Maamul Goboleed, Aqalka Sarena waxaa waajib ka saaran yahay xaqijinta dhammeytirka xal u helidda khilaafka.

Cabashooyinkii ay soo gudbiyeen Maamulada Xubnaha ka ah Dowladda Federalka waxay u qeybsan yihiin, cabashooyin Guud oo aay ka simanyihiin Maamuladu iyo kuwa gaar gaar ah.

Cabashooyinka Guud ee ay ka siman yihiin Maamuladu waa:

1. Dedejinta dhameystirka Dasturka Federalka (Xeerka Qaranka)
2. Ka howlgelidda dhismaha Ciidanka Qaranka iyo suggidda Amniga
3. Dhisidda Guddiga Garsoorka Qaranka iyo Dib-u-habeynta Garsorka
4. Ka howlgelidda dib-u-heshiisiinta iyo midnimada Qaranka.
5. Ka heshiinta qaabka dooroshada guud 2021 iyo dhismaha axsaabta.
6. Xoojinta nidaamka federaaleyn, siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaan.
7. Mideynta Qorshaha Qaranka, sida wax-qeybsiga mashariicda iyo dhaqalahaa,

iyada oo Dowlada dhexe ay yelaneysyo go'aaminta meelaha ku habboon, ka hirgelinta kabeyaasha dhaqalaha iyo bulsho ee heer qaran.

#### 8. Faragelin la'anta dorooshooyinka DXDF iyo kuwa Dowladda Dhexe;

Cabashooyinka u kala Gaarka ah ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka:

Puntland: Taageridda Ciidanka Xooga Dalka (SNA), qeybta Puntland, xaga mushaarooyinka, tababarada iyo agabka.

Jubaland: Taageridda Ciidamada dar-aawishta ee Jubbaland tayey-ntooda iyo kala howlgelidda sugidda amniga guud ee Jubbaland.

Koonfur Galbeed: Kala shaqeysta sugidda amniga Konfur Galbeed gaar ahaan wadada halbowlaho ah ee isku xirta Muqdisho iyo Baydhabo.

Galmudug: La dhisida Ciidanka Maamulka Galmudug iyo la xoreynta degaamada ay amni-darrada ku hayaan Al-shabaab.

### Gunaanadka go'aanka

Guddiga Gaar ka ah ee Aqalka Sare BF waxa ay Xukuumadda Federaalka u soo jeedinayaan in ay si dhaqso ah uga hawlgasho fulinta qodobada go'ankan kor ku xusan, ee ka kooban 8 qodob oo guud iyo 4 midba gooni u yahay maamul, oo ah nuxurka tabashooyinkii laga soo ururiyay DXDF.


Go'ankan waxaa lagu saleeyay tabashooyin u dhexeeuya Hey'ado isku Dawlad ah oo leh "Shakhsiyad Sharci" (Legal Entities), si waafaqsan

Dastuurka KMG ee Soomaaliya, kaas oo ku socod - la'aantiisu ay waxyeela u geysaneyso qabashadii adeegyadii ay dadka iyo dalka u hayeen Hay'daha Dawliga ah ee Maamulka Dhexe (DFS) iyo kuwa Degaamada (DXDF); tusaale ahaan, eeg lifaaqan qodobada Dastuurka KMG ee Federalka Somalia: Qodobka 50aad - Mabaadi'da Federaalka ee Jamhuriyadda Federalka Somalia; Qodobka 51aad - Xiriirkha Iskashiga Heerarka Dawladda Jamhuriyadda Federalka Somalia; Qodobka 52aad - Iskashiga Xukuumadaha xubinta ka ah Dawladda Federalka.

Ugu dambeyntii, Guddiga Gaar ka ah ee Aqalka Sare wuxuu go'aankiisa ku saleeyay Dastuuriyan in Heerka Dowladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ay masuuliyadooda tahay, inta badan, fulinta adeegyada ay dadku uga baahan yihiin Gobollada iyo Degmooyinka Dalka ee ka baxsan Caasimadda Muqdisho. Sidoo kale na ay masuuliyadda Dawladda Dhexe ee Federaalka tahay, "u-taagnaanta iyo metelaadda Qarannimada Soomaaliya" (the sovereignty of the Somalia Nation State), tusaale ahaan, eeg lifaaqa: qodobka 87aad - Madaxweynaha Jamhuriyadda Federalka ee Soomaaliya waa: (1) ... (b) Astaanta midnimada Qaranka, (c) Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka. Sida ku cad: qoodobka 3aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya. Tusaale ahaan Eeg: qodobka 99aad Xilalka Golaha Wasiirada (a) Dejinta siyaasadda guud ee Xukuumadda iyo dhaqangelinteeda...]

## SAFARKA GUDDOOMIYAH EE KISMAAYO

37



Golaha Aqalka Sare, isaga oo ka duulaya go'aanka Guddiga Aqalka Sare ee kor ku xusan, wuxuu guddoonsaday in safarro shaqo lagu tago Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDF) iyada oo lagu billaabayo Dowlad Goboleedka Jubaland; si loogu kuurgalo aragtiyadooda iyo taloooyinkooda ku aaddan habka ugu habboon ee loo qaban karo loogana qayb geli karo shir ay isugu yimaadaan Madaxda Xukuumadda Federaalka iyo Madaxda DXDF; si loo gaaro heshiis kama dambays ah.

Sidaas darteed, wafdi heer sare ah oo uu hoggaaminayay Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa safar shaqo ku tegay magaalada Kismaayo, Caasimadda ku-meel-gaarka ah ee Dowlad Goboleedka Jubaland 06 Diseembar 2018.

Wafdigu wuxuu hordhigay Dowlad Goboleedka Jubaland qodobada soo socda:

1. Ka wada tashiga waqtigii iyo goobtii lagu qaban lahaa shir ay wada yeelan doonaan Madaxda Xukuumadda Federaalka iyo Madaxda DXDF.
2. Ka wada tashiga xoojinta nabadda, midnimada iyo wadajirka dhammaan Umadda Soomaaliyeed.
3. Dardargelinta iyo adkaynta metelaadda Golaha Aqalka Sare ee Dowlad Goboleedyada Dalka iyo ilaalinta nidaamka Federaalka.

Madaxda Dowladda Jubaland, Odayaasha dhaqanka iyo Shacabka oo wafdigu si kala gooni-gooni ah ula kulmay waxaa ay u muujiyeen Golaha Aqalka Sare kalsooni buuxdo oo ay ku qabaan kaalinta dhedhexaadinta ee Golaha iyaga oo ku wargeliyay in Aqalku uu yahay hey'adda kaliya ee metesha danaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, waxaana la isla qaatay in shirka uu garwadeenka ka yahay Golaha lagu qabto Caasimadda Muqdisho.

## **SAFARKA GUDDOOMIYE KU XIGEENKA IAAD EE GAALKACYO**

Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka Sare Sen. Abshir Maxamed Axmed iyo wafdi uu hoggaaminayay ayaa booqasho shaqo ku tegay Magaalada Gaalkacyo iyaga oo kulan la qaataay Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug iyo wax garadka deegaanka. Socdaalka wafdigaa waxa uu ujeediisu ahay xal u helidda khilaafka u dhaxeeyaa hay'adaha dastuuriga ah ee Galmudug.

## **SAFARKA GUDDOOMIYE KU XIGEENKA 2AAD EE GAROWE**

Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad ee Golaha Aqalka Sare BFS Senator Mowliid Huseen Guhaad ayaa booqasho ku tegay Magaalada Garowe isaga oo la kulmay Madaxweynihii hore ee Dowlad Goboleedka Puntland. Sidoo kale, Guddoomiyuhu wuxuu kulan gaar ah la qaataay Guddoomiyihii hore ee Golaha Wakiillada Puntland waxayna labada guddoomiye ka wada hadleen arrimo dhowr ah oo la xiriira wada shaqeeynta labada gole.

## **KA TALO GELINTA HINDISE SHARCIYEEDYADA**

Dastuurka KMG ah ayaa gundhig u ah nidaamka federaalka ee ka hanaqaaday Dalka sida ku cad Qod.1aad (1) iyada oo Qod.48aad ee Dastuurka KMG ah uu xeerinayo in qaab dhismeedka Dowladda ee Jamhuuriyadda Federaalka uu ka kooban yahay labo heer dowladeed:

A. Heerka Dowladda Federaalka

B. Heerka Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka

Haddaba, taa micnaheedu waxa ay tahay in awoodda xukunka Dalku ay ka dhaxeyso labada heer dowladeed marka laga reebo awoodaha heer kasta uu la gaarka yahay si waafaqsan Dastuurka Federaalka, waxaana heer kasta oo dowladeed uu ku khasban yahay in uu aqoonsado heerka kale kuna shaqeeyo nuxurka Qod.50aad iyo Qod.51aad Dastuurka Federaalka. Sidoo kale, Qod.61aad (3) iyo Qod.71aad ee Dastuurka KMG ah ayaa faraya in Golaha Aqalka Sare uu metelo danaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka. Danaha uu Goluhu ku metelayo Dowladahaas waxaa ugu horreeya xeer dejinta heer federaal wuxuuna Goluhu u maray arrintaas habraaca soo socdo; si loo helo talooyinka Dowlad Goboleedyada:

1. In Golaha Aqalka Sare uu ka talo geliyo Dowlad Goboleedyada hindise shariyeedyada ay soo gudbiso Xukuumadda Federaalka ama ay curiyaan labada gole; si ay ugu soo darsadaan aragtidooda, iyadoo la raacayo habraaca hoos ku qexan:

C. In dhammaan Guddiyada Golaha marka loo soo gudbiyo hindise shariyeedka horyaalla Golaha in ay si rasmi nuqlu ka mid ah hindisaha ula wadaagaan Hay'adaha Dowladeed ee Dowlad Goboleedyada gaar ahaan Goleyaasha Xeer Dejinta.

- D. In Guddiga ay khuseyso uu warbixin ka siiyo nuqulka hindise sharchiyeedka Hey'adaha Dowlad ee Dowlad Goboleedyada.
- E. In Dowlad Goboleedyada la wadaagaan Guddiga u soo gudbiyay wixii soo jeedinno ah ama talooyin ah.
- F. In Dowlad Goboleed kasta soo magacaabo 2 – 3 xubnood oo ka qeybgala kulamada wadatashiga ah ee uu qabanayo Guddiga waxaana gacan ka geysta keenidda iyo celinta xubnahaas Hay'adaha taageera Baarlamaanka.
- G. In soo jeedinnada/talooyinka ay soo jeedinayaan Dowlad Goboleedyada lagu daro wax ka beddelka uu Guddigu u soo jeedinayo Golaha Aqalka Sare inta suurtogal ah.

Haddaba, iyada oo la fulinayo habraacan, Guddiga Kheyraadka, Kaabeyaasha Dhaqaale, iyo Gaadiidka Qaranka wuxuu la wadaagay Dowlad Goboleedyada nuqulka hindise sharchiyeedka khayraadka biyaha & dhismaha hay'adda maareynta biyaha Qaranka iyo warbixin kooban. Sidoo kale, Guddigu wuxuu ku casuumay dhageysi dadweyne oo uu qabanayay Guddigu toban xubnood oo isugu jiray xubno ka socday Guddiyada Goleyaasha xeer dejinta Dowlad Goboleedyada iyo xubno metelayay Wasaaradahooda. Xubnaha metelayay Dowlad Goboleedyada waxa ay soo jeediyeen talooyin wax ku ool ah oo lagu biiriyay nuxurka hindise sharchiyeedka.

Sidaas si la mid ah, Guddiga Garsoorka, Arrimaha Diinta & Awqaafta, Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Carruurta wuxuu marsiiyay isla habraacan hindise sharchiyeedka dhismaha Guddiyada Madaxa-bannaan ee la dagaallanka musuq maasuqa ee labada heer. Guddigu wuxuu ku casuumay dhageysi dadweyne oo loo sameeyay hindise sharchiyeedka xubno ka socday Dowlad Goboleedyada oo gaarayay ilaa toban xubnood waxayna ka kala yimaadeen Guddiyada Goleyaasha xeer dejinta Dowlad Goboleedyada, Wasaaradahooda, iyo Xeer Ilaalinta.



## KA QEYBGALKA CALEEMO-SAAR-KA MADAXWEYNEYAAL CUSUB

Dhanka kale, wafdi uu hoggaaminayay Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad ee Golaha Mudane Mowliid Xuseen Guhaad ayaa qeybalay caleemo-saarka Madaxweynaha la doortay ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed.

Sidoo kale, Golaha Aqalka Sare wuxuu si mug leh uga qeybalay caleemo-saarka Madaxweynaha la doortay ee Dowlad Goboleedka Puntland iyo shirarkii ka dambeeyay waxaana hoggaaminayay wafdigii Aqalka Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Mudane Cabdi Xaashi Cabdillaahi. Intii wafdigaa Aqalku uu ku sugnaa magaalada Garowe, wuxuu kulan shaqo la yeeshay Guddiga Joogtada ah ee Golaha Wakiillada Puntland iyaga oo isku afgartay sida ugu habboon ee loo wada shaqeyn lahaa Goluhuna uu gacan buuxdo u siin lahaa Golaha Wakiillada Puntland.

Gunaanadkii, munaasabad casho Sharaf oo si heer sare ah loo soo agaasimay ayuu Golaha Aqalka Sare u sameeyay Guddoomiyeyaasha Goleyaasha Xeer Dejinta ee Dowlad Goboleedyada iyo xubno la socday, waxayna ka wada hadleen sidii loo xoojin lahaa wada shaqeynta iyo iskaashiga Goleyaasha Xeer Dejinta.



# 5

## **METELAADDHA BULSHADA SOOMAALIYEED**

Golaha Aqalka Sare wuxuu si joogto ah uga jawaabaa dhibaatooyinka la soo gudboonaada Bulshada Soomaaliyeed isla markaasna wuxuu u ololeeyaa horumarinta adeegyada bulshada iyo sarreyn ta sharciga. Goluhu wuxuu xiriir wanaagsan la leeyahay ururada Bulshada Rayidka ee ka howlgala Dalka.

### **KA QEYBQAADASHADA GURMADKII FATAHAADAHAA**

Golaha Aqalka Sare waxa uu sameeyay fatahaadihi webiga Shabeelle ee 2018kii guddi gurmadi; si Goluhu kaalmo uga geysto marxaladaas taganeyd wuxuuna ka koobanaa sideed xubnood oo kala ah:-

1. Sen. Cabdi Axmed Dhuxulow Dhuxulow (Guddoomiye)
2. Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf
3. Sen. Saciido Xasan Cismaan
4. Sen. Prof. Maxamed Cismaan Faarax
5. Sen. Jawaahir Axmed Cilmi
6. Sen. Dr. Cismaan Maxamuud Maxamed (Dufle)
7. Sen. Axmed Macallin Cumar Nadiir
8. Sen. Muxyidiin Sh. Cali Jaamac

Guddigan wuxuu uruuriyay gurmadka fatahaadaha iyo dhibaatooyinka kale lacag dhan \$100,000 (boqol kun oo doollar) oo ay inteeda badan iska uruuriyeen Senatarada Golaha Aqalka Sare halka qaarka kalena laga isticmaalay miisaaniyadda Aqalka. Guddigu wuxuu lacagtaas u kala qeybiyay gurmadkii loo fidiyay dadkii ay dhibaatada ka soo gaartay fatahaadda Webiyada Shabeelle iyo Jubba: Hirshbeelle (\$50,000), Jubaland (\$20,000), dhibaatadii dabeylahaa badda ee Puntland (10,000) iyo Somaliland (\$20,000)

## **SHAQAALEYSIINTA DHALINYARADA AQOONYAHANKA AH**

Golaha Aqalka Sare wuxuu mar kale garowsaday in uu fursadaha shaqo ee Aqalka looga faa'ideeyo dhalinyarada aqoonyahannada ah; Xafiiska Xoghayaha Guud isaga oo ka jawaabaya baahida shaqaale ee Aqalka waxa uu isfahan kala yeeshay Hay'dda UNDP in loo shaqaaleysiyo muddo lix bilood ah shaqaalaha soo socdo:

1. Labo lataliyeyaal sharci
2. Hal khabiir arrimo baarlamaan
3. Hal sarkaal arrimaha maamulka iyo maaliyadda
4. Hal sarkaal arrimaha saxaaafadda iyo xiriirkha dadweynaha

Haddaba, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare waxa uu ku magacaabay go'aan maamul oo summadiisu tahay Tix: GAS/B-10/08/18 ee soo baxay 7th July 2018 guddi shaqaale ku meel gaar ah oo ka koobanaa xubnaha soo socdo:

1. Sen. Cabdiwaaxid Cilmi Cumar (Goonjeex), Guddoomiye
2. Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf
3. Sen. Axmed Cabdixafiid Bulsho
4. Sen. Xuseen Xaaji Cali Cabdalla
5. Sen. Saciido Xasan Cusmaan
6. Sen. Cabdirisaaq Axmed Cali
7. Xoghayaha Guud Cali Maxamed Jaamac
8. Ku Xigeenka Xoghayaha Guud Axmed Yuusuf Cabdulle
9. Agaasime Faadumo Maxamed Maxamud

Guddiga isaga oo ka ambaqaadaya howshii loo igmaday ee ahayd in uu go'aan ka gaaro qaadashada shaqaalaha kor ku xusan wuxuu u maray gudashada xilkooda habraaca soo socdo:

1. In shaqaaleysiinta loo maro hab hufan oo ay ka qeybgeli karaan dhammaan qeybaha kala geddisan ee Ummadda Soomaaliyeed iyada oo la tixgelinayo tayada tartameyaasha la qaadanayo.
2. In marka la qiimeynayo tartameyaasha, dhibcaha loo kala siinayo codsaneyaasha iyada oo tartame kasta laga siinayo inta uu ka mudan yahay laguna qiimeeyo seddex arrin:
  - A. Waafaqsanaanta Shuruudaha Shaqada
  - B. Heerka Aqoonta iyo Xirfadda
  - C. Khibradda Shaqo
3. In imtixaanka iyo weydiin oraaheedka shaqo ay qaado Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed iyada oo arrintaas laga fariistay Madaxda Jaamacadda.
4. In hufnaanta sixitaanka imtixaanka lagala shaqeeyo Jaamaacadda iyada oo la isla qaatay in waraaqaha xogta shahsiga ay ku qoran tahay uu

haayo Guddoomiyaha Guddiga, macallinmiintuna ay soo saxaan warqad lambar sireed kaliya ku qoran yahay.

Sidaas hufan ayuuna Guddigu ku xulay liiska gaaban ee weydiin oraaheedka shaqo iyada oo jago kasta laga qaataay seddexda qof ee ugu dhibcaha badnaa waxaana lagu ballamay in weydiin oraaheedka shaqo la qaado sida ugu dhakhsaha badan.

Guddigu isaga oo kaashanaya bare-yaasha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed wawa uu qaaday weydiin oraaheedkii shaqo ee lagu ballansanaa waxaana ku soo baxay wareysigii shaqo shan tartame.

Sidoo kale, Golaha Aqalka Sare isaga oo ka turjumaayo kaalintiisa metelaadda bulshada wawa uu mar labaad fursad siyyay dhallinyaradii Soomaaliyeed ee ay u shaqaaleysiisay Aqalka markii hore Hay'adda SSG (Strengthening Somalia's Governance) wuxuuna u shaqaaleysiay si rasmi ah.

## **XOOJINTA XIRIIRKA DADWEYNNAHA**

Dhanka kale, Golaha Aqalka Sare wuxuu ahmiyad gaar ah siyyaa munaasabadahe dadweynaha iyo wada tashiga uu la leeyahay bulshada rayidka ah; tusaale, ahaan Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare wuxuu ka qeygalay dhowr munaasabood oo ay ku casuumeen dadweynaha iyo hey'adaha metela waxaana ka mid ah:

- A. Xafladda furitaanka saamiyada Shirkadda Somtel oo lagu qabtay magaalada Muqdisho.
- B. Furitaanka tababar - xirfadeedka qoraal – curinta Toolmoon oo ay soo qaban-qaabisay Akadeemiyad Goboleedka Afka Soomaaliga Ee AGA, kaas oo soconaayay mudo bil ah.
- C. Munaasabad lagu xusayay Sanad Guurada 20aad Ee

ka Soo wareegatay Aas Aaska Golaha Abwaanada Soomaaliyeed.

- D. Munaasabad lagu maamuusayay qalinjebinta arday wax ka bartay Jaamacadda Soomaaliya.
- E. Munaasabad lagu xusayay Sanad guuradii Shanaad ee ka soo wareegtay aas aaska Akadeemiyod Goboleedka Af-Soomaliga ee Gobolka Banaadir.

Waxaa, sida oo kale, qabsoomay kulan u dhaxeeyay Guddiga Xallinta Khilaafaadka ee Aqalka Sare iyo Ururada Bulshada Rayidka, waxayna la wadaageen Guddiga talooyin wax ku ool ah oo wax badan ku biriiriay Guddiga Golaha Aqalka Sare ee ku howlanaa xal u raadinta khilaafaadka u dhaxeeyay Xukuumadda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka .

Golaha Aqalka sare isaga oo ka ambaqaadaya waajibkiisa metelaadda dadweynaha wawa uu warbixin dhammeystiran ka dhagaystay Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda wuxuuna Guddoomiyaha Jaamacadda la wadaagay Golaha wax qabadka Jaamacadda iyo adeegyada wax-barasho ay u hayaan bulshada soomaaliyeed.

Arrimaha kor ku xusan waa qeybyar oo ka mid ah howlaha la taaban karo ee uu Goluhu ku xoojinaayo adeegga iyo xiriirka kala dhaxeeya Bulshada qeybaheeda kala duwan gaar ahaan dhallinyarada iyo haweenka oo gundhig u ah jiritaanka Bulshada Soomaaliyeed. Goluhu wuxuu sanadaha soo socdo ku talo jiraa in uu kordhiyo barnaamijyada wax-tar-ka toos-ka ah u leh Bulshada Soomaaliyeed.

# 6

## XIRIIRKA CAALAMIGA EE GOLAJA AQALKAA SARE

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa uu metelaa Shacabka Soomaaliyeed iyo danahooda wuxuuna ka mid yahay hey'adaha ugu sarreeya Dowladda Federaalka, ayna ka go'do talada Dalka. Sidaas darteed, waxaa Golaha booqashooyin kala duwan ku yimid madax heer caalami ah, ururo caalami ah, iyo wakiillo dowlado; si ay xiriir wanaagsan ula yeeshaan Golaha Aqalka Sare waxna ula qabtaan Golaha iyo Bulshada Soomaaliyeed. Guddoonka Aqalka sare ayaa kulamo la yeeshay qeybaha hoos ku xusan iyaga oo kala wada hadlay sidii ay ula yeelan lahaayeen wada shaqeyn buuxdo loona caawin lahaa Golaha maadaama uu yahay hay'ad cusub oo dhawaan la unkay isla markaasna Goluhu uu ka faa'ideysto taageeradooda iyo xiriirkha aqoon kororsi ee hay'adahaas:

1. Xafiiska Siyaasadda ee Qaramada-midoobay UNPOS
2. Midowga Yurub (EU)
3. Safiirkha UK u fadhiyo Soomaaliya
4. Safiirkha Turkiga u fadhiya Dalka
5. Safiirkha Dalka Talyaaniga
6. Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibedda Finland
7. Safiirkha Jaamacadda Carabta u fadhiya Soomaaliya
8. Wasiir Ku Xigeenka Arrimaha Dibedda Dalka Finland
9. Wakiilka Gaarka ah ee urur goboleedka IGAD
10. Wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay
11. Wakiilka Gaarka ah ee Midowga Afrika

### KULAMADA GUDDOONKA IYO DIBLOMAASIYIINKA

Guudoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa kulan la qaata Amb. David Concar iyaga oo ka wada hadlay xaaladda guud ee Dalka iyo arrimaha doorooshooinka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya.



Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka Sare BFS Mudane Abshir Maxamed Axmed, Guddomiye Ku Xigeenka 2aad ee Aqalka Sare Mudane Mowliid Xuseen Guhaad iyo Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Dibedda ee Aqalka Sare BFS ayaa ka qeybgalay munaasabad uu Wasiir Ku Xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibedda Finland uu kaga hadlayay isu soo dhawaanshaha Dalkiisa iyo Dalkeenna, mashaariicda ay ka fulinayaan Dalka, in ay aqoonsan doonaan Baasaboorka Diblomasiga ee leh diiwaangelinta jireed (biometriga ah) iyo dardar gelinta xiriirkha labada dal.

Dhanka kale, Gudoonka Aqalka Sare ayaa qaabilay wafdigii ka socday Dowladda Finland ee uu hoggaaminayay Wasiir ku-xigeenka Arrimaha Dibadda Finland, Samuli Virtanen, waxayna ay ka wada hadleen xiriirkha labada dal ka dhaxeeya. Wasiir Ku-xigeenka Finland ayaa bogaadiiyay kulanka uu la qaataay Golaha Aqalka Sare isaga oo sheegay in ay gacan weyn ka geysan doonaan sidii ay uga la shaqayn lahaayeen arimaha federaalka Golaha Aqalka Sare ee BFS.

Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo ay wehliyaan Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad Sen. Mowliid Xuseen Guhaad iyo Habdhowraha Aqalka Sare Cabdikaafi Macallin Xasan ayaa xafiiskiisa ku qaabilay safiirkha cusub ee Jamhuuriyadda Dalka Turkiga u soo magacowday Soomaaliya Amb. Mehmet Yilmaz.

Guddoonka Aqalka Sare ayaa xarunta Golaha Aqalka Sare kulan kula qaataay Safiirkha Dowladda Talyaaniga ee Soomaaliya iyo wafdi uu hoggaaminayay. Kulankan

qaabilaadda ahaa oo ay Guddoonka Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ku qaabileen Safiirkha Dowladda Talyaaniga u fadhiya Soomaaliya iyo xubno ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Dibedda Talyaaniga ayaa waxaa looga hadlay xiriirkha Aqalka Sare iyo Aqalka Senate-ka Talyaaniga iyada oo la isla qaataay in labada aqal ay yeeshan iskaashi wada shaqayn iyo khibrado is dhaafsi ah. Safiirkha Dowladda Talyaaniga u fadhiya Soomaaliya Mr. Carlo Campanile ayaa Golaha Aqalka Sare uga mahad celiyay howlaha dhix dhixaadinta ee uu waday Goluhu, isaga oo sheegay in Dowladda Soomaaliya iyo Talyaaniga uu ka dhaxeeyo xiriir soo jireen ah.

Guddomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa xafiiskiisa ku qaabilay wafdi ka socday IGAD (Ururka Horumarinta ee Dowladaha Afrika). Kulankan ayaa waxaa looga hadlay halka ay marayso xaaladda Dalka, dagaallada ka dhacay Tukoraq, khilaafka Galmudug iyo dedaallada dhix-dhexxaadinta ee uu waday Golaha Aqalka Sare, waxaana la isla gartay in IGAD ku tageerto Soomaaliya sidii ay arrimaheeda gudaha u xallisan lahayd.

Guddomiyaha Aqalka Sare Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa ka qeybgalay munaasabadda xuska Maalinta Aas Aaska Jamhuuriyadda Dalka Turkiga, taas oo lagu qabtay Safaaradda Turkiga ee Muqdisho, waxaana Guddomiyaha ku soo dhaweyay xafladda Safiirkha Dalka Turkiga u fadhiyay Soomaaliya Ambassador Olgan Bekar.

Guddomiyaha Aqalka sare Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa xafiiskiisa kula kulmay wakiilka gaarka ah ee Qaramada Midoobay Nicholas Haysom iyo Wakiilka gaarka ah

ee Midowga Afrika u qaabilan Soomaaliya Ambassador Francisco Madeira, kuwaasi oo ay ka wada hadleen sidii loo dejin lahaa xaaladda siyaasadeed ee Dalka iyo xal u raadinta khilaafka u dhaxeyay Xukuumadda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa kulan gaar ah kula qaatay Xarunta Golaha Aqalka Sare wafdi ka socday Midowga Yurub. Guddoomiyaha ayaa uga mahad celiyay Midowga Yurub booqashada Aqalka, kaalmada joogtada ah ee ay siiyaan Dowladda Soomaaliya iyo isgarab taagooda ku aaddan dib u dhiska dowladnimada Soomaaliya. Dhanka kale, wafdiga ayaa bogaadiyay kaalinta Aqalka Sare ee dhex-dhexaadinta iyo xal u raadinta khilaafka soo kala dhexgalay labada heer maamul ee Dowladda, iyaga oo sheegay in ay tahay tallabo guul u ah dowladnimada Soomaaliya haddii lagu guulaysto dhex-dhaxaadinta, taasna ay caddeyneysa biseelka siyaaseed, rabitaanka siyasadeed ee wada jir ah iyo midnimada Dalka.

Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo uu wehliyo Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad ayaa xafiiskiisa ku qaabilay Wakiilka Cusub ee Xoghayaha Qaramada-midoobay u qaabilan Somaaliya Mudane Nicholas Haysom. Kulanka ayaa looga wada-hadlay sidii ay u wada shaqayn lahayeen Xafiiska Qaramada-midoobay ee Soomaaliya iyo Aqalka Sare ee BFS.

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa xafiiskiisa kulan kula yeeshay wafdi ka socday Xafiiska Siyaasadda Qaramada Midoobay (UNPOS). Kulanka oo ay goob-joog ka ahaayeen Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad ee Golaha Aqalka Sare, xubno ka tirsan

Guddiga Garsoorka, Arimaha Diinta iyo Awqafta, Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Carruurta ee Aqalka Sare iyo Senatarro kale oo ka tirsan Golaha Aqalka Sare ayaa looga hadlay arrimo la xiriira hindise shariyedka dhismaha guddiga la dagaallanka musuq-maasuqa ee horyiillay Aqalka Sare ee BFS. Guddoonka Aqalka Sare iyo UNPOS ayaa isla gartay habkii UN – ku gacan uga gaysan lahaayeen arrimaha farsamo iyo la talinta sharci ee howlaha la xiriira Sharciga.

Guddoonka Golaha Aqalka Sare ayaa qaabilay Safiirka Jaamacadda Carabta u fadhiya Soomaaliya mudane Xamuud Samraan Alxuwaytii. Ugu horrayn Guddoomiyaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi ayaa safiirka kaga mahad celiyay imaatinkiisa oo ah midkii ugu horreeyay oo wafdi ka socda Jaamacadda Carabta ku soo gaaraan Golaha Aqalka Sare. Safiirka ayaa mahad ballaaran u jeediyay Guddoonka Aqalka Sare waxa uuna sheegay in Jaamacadda Carabtu ay gacan ka gaysan doonto qabashada kulamo iyo shirar ku saabsan deymo cafinta Dalka Soomaaliya; si Dalku uga soo kabsado xagga dhaqaalaha. Sidoo kale safiirka ayaa sheegay in dhowaan dalalka Sacuudi Carabiya iyo Aljeeriya ay ku dhawaaqueen in ay cafiyeen deymihii ay ku lahaayeen Soomaaliya, dalalka kalena ay Jaamacadda Carabtu ku qancin doonto in ay qaadaan talladaas oo kale. Safiirka ayaa ka hadlay mashaariicda horumarineed ee Jaamacaddu qorshaynayso in ay ka fuliso Soomaaliya wuxuuna Safiirku sheegay in Jaamacaddu qorshaynayso in ay dib u dhisto maktabaddii Qaranka, ka qayb qaadato sare u qaadista tayada waxbarashada Dalka iyo in ay dastuurka Dalka u turjunto afka carabiga. Guddoomiyaha Aqalka

ayaa bogaadiiyay dhammaan qodobbadii uu soo bandhigay safiirka waxaa uuna ballan qaaday in ay xiriir wada shaqayn la yeelan doonaan dalalka carbeed.

Wafdi ka socday Midowga Yurub ayaa booqasho shaqo ku yimid xarunta Golaha Aqalka Sare iyaga oo kulan gaar ah la qaata Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ee BFS. Wafdigaa iyo Guddoomiyaha ayaa wada hadlay kaalmada joogtada ee uu Midowga Yurub siiyo guud ahaan Soomaaliya. Wafdigaa ayaa ka dhagaystay Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare baahiyaha gaarka ah ee Aqalka iyo meelaha uu Aqalka doonayo in gacan laga siiyo. Guddoomiyaha ayaa u sheegay in Aqalku u baahan yahay in uu safaro aqoon kororsi ku tago dalalka uu nidaamka federaalka ka hirgalay, sidoo kale, in Midowga Yurub uu gacan wayn ka gaysto sare u qaadidda xiriirka Aqalka iyo Dowlad Goboleedyada. Ugu dambayntii, Guddoomiyaha iyo wafdigii ayaa isla qaata ay ahmiyadda ay leedahay in si deg deg ah loo dhammaystiro howlaha dib u eegista Dastuurka KMG ah iyo sidii uu EU-da gacan uga gaysan laheyd habsami u socodka howlaha dib u eegista Dastuurka.

## **SAFARADA DIBEDDA EE GUDDOOMIYAH A QALKA SARE**

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa safarro shaqo ku tegay dalalka Kenya, Turkiga, iyo Kuuriyada Koonfureed isaga oo kulamo muhiim ah la yeeshay madax kana qeybgalay shirar caalami ah.

Guddoomiyuhu wuxuu magaalada Nairobi kulan kula qaata dhiggiisa Guddoomiyaha Senate-ka Kenya waxayna ka wada hadleen xiriirka labada dal gaar ahaan xiriir labada gole ay wada yeelan karaan iyo in la is dhaafsado khibradaha, wuxuuna Guddoomiyaha ku casuumay dhiggiisa in uu booqasho ku yimaado Magaalada Muqdisho. Guddoomiyaha Senate-ka Kenyana wuu ka aqbalay casumaadda.

Dhanka kale, Guddoomiyaha ayaa labo kulan la qaata xubno ka socday Midowga Yurub (EU)



iyaga oo ka wada hadlay meelaha Aqalku u baahan yahay in laga caawiyo iyo in Golaha Aqalka Sare uu korjoogteyn ku sameeyo isticmaalka lacagaha Midowga Yurub ugu deeqo Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Sidoo kale, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare isaga oo ka jawaabay casuumaadda uu Guddoomiyaha Baarlamaanka Dalka Turkiga Mudane Binali Yildrim u fidiyay Golaha Aqalka Sare si Goluhu uga qayb-qaato shir-wayne looga hadlayay taageeridda iyo is-garab taagga Qudus, wuxuu ka qeybgalay isaga iyo wafdi uu hoggaaminaayay shirkaas, wuxuuna Guddoomiyuhu halkaas ka jeediyay khudbad qiimo badan oo uu kaga hadlay Qadiyadda Falastiin, gaar ahaan garab istaagista Caasimadda Barakaysan ee Qudus iyo in la adkeeyo in Qudus ay tahay Caasimadda Falastiin, isla markaasna la cambaareeyo tacaddiyada joogtada ah ee ay Yuhuuddu ku hayaan Shacabka Falastiin. Intii uu ku sugnaa Dalka Turkiga, Guddoomiyaha iyo wafdigiisu waxay kulamo la qaateen dhiggooda Dalkaas iyaga oo ka wada hadlay xiriir labada gole iyo in si dhab loo garab istaago Qaddiyadda Falastiin. Ugu dambeyntii, Guddoomiyaha ayaa guddoonsaday in Soomaaliya ay ku yeelato Baarlamaanka lagu taageerayo Qudus 15 xubnood, sideed xubnood waxaa loo qoondeeyay Golaha Shacabka halka toddobada kale loo qoondeeyay Golaha Aqalka Sare.

Dhanka kale, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare wuxuu ka qeybgalay shir ka dhacayay caasimadda Dalka Kuuriyada Koonfureed ee Seoul oo lagaga hadlayay isdhexgalka diimaha iyo kaalinta ay ku leeyihii nabadda Adduunka.

## **ARRIMO KALE**

Golaha Aqalka Sare ayaa xaflad sagootin ah oo si heer sare ah loo soo agaasimay u sameeyay Safiirkii hore ee Dalka Turkiga Mudane Amb. Oglan Bekar, Guddomiyaha Golaha Aqalka Sare Mudane Cabdi Xaashi Cabdulahiayaana guddonsiiyay billad sharafeed lagu maamuusay xiriirkii wanaagsanaa ee uu kula shaqeyay Dalka gaar ahaan hay'adihiisa dastuuriga ah.

Senatarro ka tirsan Aqalka Sare ayaa ka qeybgalay shirka caalamiga ah ee dhalinyarada Baarlamaanada Adduunka oo ka dhacay Magaalada Baku, Azerbaijan. Sidoo kale, Senatarro kale ayaa shirar kaga qeybgalay Magaalada Beyruud ee Dalka Lubnaan.

Ugu dambeyntii, Guddoonka iyo Xubnaha Golaha Aqalka Sare waxay shirar iyo siminaarro uga qeybgaleen dalal kale oo ay ka mid yihiin Kenya, Uganda, Turkiga, iyo Kuuriyada Koonfureed.



# 7

## MAAMULKA GOLAH AQALKA SARE

### Oraahda Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare

Shaqaalaha Maamul ee Golaha Aqalka Sare waxa ay halbowle u yihiin habsami u socodka howlaha kala geddisan ee Golaha, waxa ayna gacan farsamo oo buuxda siyaan Guddoonka Golaha, Guddiga Joogtada ah, Guddiyada Golaha, iyo Senatarada guud ahaan.

Shaqaalaha Golaha Aqalka Sare waxa ay xubno muhiim ah ka yihiin shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda waxa ayna ku maqaam iyo la xuquuq yihiin shaqaalaha dhiggooda ah ee laamaha kale ee Dowladda Federaalka.

Xafiisyada Maamul ee Golaha Aqalka Sare iyaga oo kaashanaya Guddoonka Golaha waxay soo bandhigeen wax qabad waxtar leh, waxaana ku dhiirrigelinayaan waaxyaha Golaha in ay joogteeyaan howshii wanaagsaneyd ee ay qabteen ugana jawaabeen baahida Golaha.

Xafiisyada maamul ee haatan shaqeeya waxa ay muujiyeen dedaal dheeri ah iyaga oo ku shaqeeyay duruufo shaqaale yari iyo dhaqaale xumo una dhabar adeegay gudashada xilka loo igmaday.

Golaha Aqalka Sare waxaa ka go'an in uu sare u qaado xirfadda iyo aqoonta shaqaalahiisa, wuxuuna ayna had iyo jeer ka shaqeyn doonaa sidii ay u heli lahaayeen tababarro iyo fursado aqoon kororsi.

Golaha Aqalka Sare wuxuu ku bogaadinayaan shaqaalaha Golaha howl karnimada, hufnaanta, iyo wax qabadka ay la yimaadeen, wuxuuna u rajeynayaan hore u socod iyo guul sanadaha soo socdo.

Guul iyo gobonnimo,

**Cali Maxamed Jaamac**

Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare



**Cali Maxamed Jaamac**

Xoghayaha Guud ee Golaha  
Aqalka Sare

## **WAX QABADKA MAAMUL EE GUDDOONKA**

Guudoonka Golaha Aqalka Sare waxay kaalin muhiim ku leeyihiiin socodsiinta howlaha maamul ee Golaha iyaga korjoogteyn ku sameeya Xafiisyada Maamul ee Golaha isla markaasna ku haga tubta wanaagsan ee maamul wanaagga.

Guudoonka Golaha Aqalka Sare waxay suurtogeliyeen in si habsami leh ay shaqeeyaan Xafiisyada Golaha iyaga oo maalin kasta ku shaqeeyaa xafiisyadooda, taasna waxay wax badan ka tartay in howl maalmeedka Golaha uu u socdo is wanaagsan oo aan caqabad lahayn.

Guudoonka Golaha Aqalka Sare waxay si deg deg ah uga jawaabaan dhammaan howl xafiiseedka maalinlaha ah, waxayna wax ku maamulaan mabaadii' hay'adeed ee dhaqangalka ah. Guudoonku waxay si joogto ah ula socdaan howlaha ay Xafiisyada Maamul u hayaan Golaha waxayna ku dhiirrigeliyaan shaqaalaha in ay yimaadaan wax qabad muuqda oo ka jawaabaya baahida Golaha.

Ugu dambeyntii, Guudoonka Golaha Aqalka Sare waxa ay saxiixaan heshiisyada uu Aqalku la gelayo hey'adaha taageera Golaha, heshiisyada hay'adaha kale iyo heshiisyada maamul ee aan looga maarmin saxiixa Guudoonka.

## **SHAQAALAH A GOLAH A QALKA SARE & WAAJIBAADKOODA**

Golaha Aqalka Sare wuxuu ilaa hadda shaqaaleysiyye guud ahaan 27 xubnoon oo kala ah: Xoghayaha Guud, Ku Xigeenkiisa, shan Agaasime Waaxeed, hal howlwadeen oo ka shaqeeyaa arrimaha maamulka iyo maaliyadda, afar Farsamoyaqaan, iyo 15 shaqaale nadaafadeed. Weli waxaa jirta baahi loo qabo in la qaato shaqaale cusub oo ka howlgala xafiisyada kala duwan ee Golaha.


Golaha Aqalka Sare wuxuu si rasmi ah u shaqaaleysiyyay isla markaasna uu dallacsiiyay labo xubnoon oo ku soo shaqeeyay si shuruud la'aan ah wuxuuna ku shaqaaleysiyyay jagooyinka kala ah:

- Agaasimaha Waaxda Xiriirka Dowlad Goboleedyada
- Howlwadeen arrimaha maamulka iyo maaliyadda

Haddaba, waajibaadka loo igmaday xafiisyada maamul ee Golaha waxaa ka mid ah:

1. Isu duwidda arrimaha maaliyadda Aqalka.
2. Maareynta Arrimaha Shaqaalaha Aqalka.
3. Qorsheynta iyo qabashada howl maalmeedka maamul ee Golaha.
4. Ku gacan siinta Senatarada xil gudashadooda iyaga oo u fidinaya adeegyada farsamo ee aan laga maarmin.
5. Isku xirka Golaha Aqalka Sare iyo Hay'adaha kale ee Dowladda
6. Isku dubbaridka xiriirada Golaha iyo Hay'adaha taageera Baarlamaanka.
7. Diyaarinta warbixinnada iyo howlaha kale ee looga baahdo.
8. Casriyeynta habka uu u shaqeeyo Golaha iyo hirgelinta nidaam casri oo ka jawaabaya baahida Golaha

## **QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE GOLAH AQALKA SARE**





## **WAXQABADKA MAAMULKA GOLAH AQALKA SARE**

Xafiisyada Maamul oo uu hoggaaminaayo Xafiska Xoghayaha Guud, iyaga oo kaashanaya hagidda wanaagsan ee Guddoonka Golaha Aqalka Sare, waxaa u qabsoomay howlaha soo socdo:

1. Maareynta arrimaha maaliyadda Aqalka ee 2018. Ma jiraan wax howlo maaliyadeed ah oo qabyo ah waxaana la diyaariiyay xisaab xir sannadeedka.
2. Hirgelinta habraaca maaliyadda ee Qaranka (commitment control).
3. Qalabeynta dhammaan Xafiisyada iyada oo la dhigay agab ku filan lana geliyay qaboojiyeyaa tayo leh.
4. Diiwaangelinta hantida maguurtada ah ee Golaha taas oo fududeyneysa la socoshada dhaqdhaqaada hantidaas.
5. U helidda shaqaale Guddiyada Golaha iyada oo si rasmi ah loo shaqaaleysiyyah dhalinyaro hore ula shaqeyneysay Guddiyada Golaha.
6. Dejinta nidaamka kaydinta xogta Golaha iyo hirgelintiisa waxaana lagu soo kordhiyay in hab digital ah loo keydiyo si aanay xogta Aqalku u lumin.
7. Gaarsiinta dukumiintiyada meel allaale meeshii ay ku socdaan iyo qabashada dukumiintiyada soo gala Golaha iyada oo la diiwaan geliyay.
8. Dejinta habraacyada shaqo ee lagama marmaanka u ah habsami u socodka Howlaha Golaha waxaana gacan ka geystay shaqaale khubaro ah oo loo qaataay qabashada howlahaas.
9. Agaasimidda tabobar ku saabsan maareynta Baarlamaanadda oo ay ka faa-ideysteen shaqaalahaa maamul ee labada aqal iyo shaqaalahaa maamul ee goleyasha xeer dejinta ee Dowlad Goboleedyada.
10. Agaasimidda fadhiyada, kulamada, safarada iyo munaasabadaha Golaha iyada oo ay ku riyaaqueen wax qabadkan Guddoonka iyo Senatarada Golaha.
11. Hirgelinta habka borotokoolka Aqalka iyada oo gacan buuxdo laga siiyay Xubanaha Golaha arrimaha borotokoolka.
12. Dejinta iyo hirgelinta nidaamka ID – Card-ka Aqalka oo ay qaateen dhammaan shaqaalahaa Golaha.
13. Diiwaangelinta shaqaalahaa Aqalka iyo ku wareejinta mushaaraadkooda iyo guddooyinkooda khasnadda Dowladda.
14. Abuuridda xiriiro wanaagsan oo lala yeeshay hey'adaha kale ee Dowladda, Hay'adaha taageera Baarlamaanka, iyo Ururada kale ee daneeya arrimaha Baarlamaanka iyada oo lala kaashanaayo Guddoonka iyo Senatarada Golaha. Taasna waxa ay suurtogelisay in Goluhu uu ka helo taageero Hay'adda UNDP iyo Maxplanck. Sidoo kale, Goluhu wuxuu casumaad rasmi ah ka helay Guddoomiyaha Baarlamaanka Dalka Tulkiga isaga oo

- ka qeygalay shir lagu taageerayay Qudus.
15. Diyaarinta dhammaan dukumiintiyada iyo warbixinnda uu u baahnaa Golaha sannadkii 2018.
  16. Dhowridda wakhtiga shaqada (8:00 a.m. – 4:00 p.m.) iyada oo dhammaan shaqaalaha Golaha ay si casri ah u saxiixaan gelid iyo bixidba.
  17. Xoojinta xiriirka Golaha iyo Bulshada Soomaaliyeed iyada oo la adeegsanaayo hababka casriga ah ee lagu wadaago xogta sida website ama akoonno social media ka furan waxaana bogagga Golaha ku xiran in ka badan 23 kun oo ruux.
  18. U helid la talin sharci Guddoona iyo Guddiyada Golaha iyada oo lagala shaqeeyay arrimo sharci oo u baahnaa xal deg deg ah.
  19. Ka shaqeynta ilaa afar sharci oo Goluhu meel mariyay iyada la sameeyay howlaha farsamo ee qoridda shuruucda, diyaarinta isbarbardhigyo iyo warbixinnadooda, lafagurid sharci, iyo la talin sharci oo qoraal iyo afba ah.
  20. Diyaarinta iyo daahfuridda qol shirar oo si casri ah loo qalabeeyay kaas oo fududeeyay kulamada Guddiga Joogtada ah iyo Guddiyada kaleba.
  21. Isugu imaanshaha kulamo shaqo oo lagu qorsheeyo howl maalmeedka laguna kala warqaato.
  22. Kormeerka shaqaalaha Golaha iyo ku hagiddooda sida ugu habboon ee loo qaban karo howlaha loo xilsaaray.
  23. Agaasimidda arrimaha sugidda amniga xarunta Golaha Aqalka Sare iyada oo wada shaqeyn dhow lagala yeeshay Ciidanka Ilaalada Golaha iyo Ciidamada AMISOM ee ka howlgala xarunta Golaha.
  24. Ka diyaarinta iyo keydinta muuqaallo iyo sawiro dhammaan kulamada, safarada, iyo munaasabadaha Golaha.
  25. Xoojinta xiriirka warbaahineed ee Golaha Aqalka Sare si loo baahiyo wararka ku saabsan wax qabadka Golaha iyo Guddiyadiisa.
  26. Diyaarinta iyo ka shaqeysiinta emailada rasmiga ah ee Golaha, Guddiyada, Senatarada, iyo shaqaalaha maamul.
  27. Wargelinta kulamada Golaha Guud, Guddiga Joogtada ah, iyo mar kasta oo loo baahday.
  28. Billaabidda habka tabinta tooska oo laga higelin doono Golaha Aqalka Sare si dadweynuhu ula socdaan kulamada Golaha iyo munaasabadihiisa.
  29. Diyaarinta warbixin sanadeedka 2017 iyo 2018 iyada oo laga daabacay tiradii loo baahnaa.

## LIFAAQYO:

### LIFAAQA B: GUDDIYADA GOLAHA AQALKA SARE

Xubnaha Guddiga Joogtada ah

Lr.	Magaca	Xilka
1.	Senator Cabdi Xashi Cabdullaahi	Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
2.	Senator Abshir Maxamed Axmed	Guddoomiye ku-xigeenka 1aad
3.	Senator Mowliid Xuseen Guhaad	Guddoomiye ku-xigeenka 2aad
4.	Senator Cabdikaafi Macalim Xassan	Hab-dhowraha Golaha
5.	Senator Fartuun Cabdullaahi Faarax Karaama	Ku Xigeenka Hab-dhowraha Golaha
6.	Senator Xassan Faarah Xujaale	Guddoomiyaha Guddiga xeer hoosaadka, anshaxa, xasaanadda, & daryeelka Senatarada
7.	Senator Samsam Ibraahim Cali	Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka, Arimaha Diinta & Awqaafta, Xuquuqul Insaanka, Haweenka Iyo Caruurta
8.	Senator Muxiyadian Sh Cali Jaamac	Guddoomiyaha Guddiga ArimahaGudaha, Dibu Heshiisiintaiyo Xiriirkha Dawlad Goboleedyada.
9.	Senator Maxamed Amiin Sheekh Cusman	Guddoomiyaha Guddiga Difaaca iyo Amniga
10.	Senator Cabdirisaq Cusman Xassan (Jurille)	Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Dibedda Qorsheynta, maalgashiga iyo iskaashiga Caalamiga ah
11.	Senator Axmed Macalim Cumar Axmed (Nadir)	Guddoomiyaha Guddiga Horumarinta Adeega Bulshada, Arimaha Bani'aadanimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka.
12.	Senator Ilyas Cali Xassan	Guddoomiyaha Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabayaasha Dhaqaalaha & Gaadiidka.
13.	Senator Cabdi Axmed Dhuxulow	Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska.
14.	Senator Cabdi Xassan Cawaale (Qaybdid)	Guddoomiyaha Guddiga la socodka Dib ueegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

## **Xubnaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La Socodka Hirgelinta Dastuurka (Aqalka Sare)**

1. Sen Cabdi Xasan Cawaale “Qeybdii” – Guddoomiye
2. Sen. Xuseen Sheekh Maxamuud – Xoghaye
3. Sen. Iftiin Xasan Imaan “Baasto” – Xubin
4. Sen. Cabdikariim Maxamed Xasan – Xubin
5. Sen. Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil “Fartaag” – Xubin

## **Xubnaha Guddiga Xeer Hoosaadka, Anshaxa, Xasaanadda iyo Daryeelka Senatarada**

1. Sen. Xasan Faarax Xujaale – Guddoomiye
2. Sen. Axmed Cabdixafiid Maxamed “Bulsho” – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Cabdullaahi Cabdi Garuun – Xubin
4. Sen. Bilaal Idiris Cabdullaahi – Xubin
5. Sen. Mahdi Daahir Sh. Nuur – Xubin

## **Xubnaha Guddiga Garsoorka, Arimaha Diinta & Awqaafta, Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Caruurta**

1. Sen. Zamzam Ibraahim Cali – Guddoomiye
2. Sen. Faadumo Xasan Aadan “Geriy” – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Cismaan Axmed Macow – Xoghayn
4. Sen. Cumar Cabdirashiid Cali Sharma’arke – Xubin
5. Sen. Abuukar Axmed Xaashi – Xubin

## **Xubnaha Guddiga Arimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta iyo Xiriirka Dawlad Goboleedyada.**

1. Sen. Muxyidiin Sh. Cali Jaamac – Guddoomiye
2. Sen. Jawaahir Axmed Cilmi – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Timiro Maxamed Cali – Xoghayn
4. Sen. Maxamed Xuseen Raage – Xubin
5. Sen. Saciido Xasan Xuseen – Xubin
6. Sen. Cabdiwaaxid Cilmi Joongeex – Xubin

## **Xubnaha Guddiga Difaaca iyo Amniga**

1. Sen. Maxamed Amiin Sh. Cismaan – Guddoomiye
2. Sen. Xuseen Cali Xaaji Cabdalla – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Axmed Xaashi Maxamuud – Xubin
4. Sen. Cabdirisaaq Axmed Cali – Xubin

## **Xubnaha Guddiga Arrimaha Dibedda, Qorsheynta Qaranka, Maalgashiga iyo Iskaashiga Caalamiga ah:**

1. Sen. Cabdirisaaq Cismaan Xasan “Jurile” – Guddoomiye
2. Sen. Maxamed Cismaan Faarax “Dhagajuun” – Guddoomiye Ku Xigeen

3. Sen. Siciid Cabdi Xuseen — Xoghayn
4. Sen. Ayuub Ibraahim Yusuf — Xubin
5. Sen. Cabdisalaam Xaaji Maxamed — Xubin
6. Sen. Shugri Aadan Maxamed

**Xubnaha Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada, Arimaha Bani'aadannimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka.**

1. Sen. Axmed Macalin Cumar Nadiir — Guddoomiye
2. Sen. Adan Cali Adan — Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Muno Xasan Cumar — Xoghayn
4. Sen. Zamzam Daahir Maxamuud — Xubin
5. Sen. Cusmaan Maxamuud Maxamed — Xubin
6. Sen. Nuura Faarax Jaamac — Xubin

**Xubnaha Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabeyaasha Dhaqaalaha & Gaadiidka**

1. Sen. Ilyas Cali Xasan — Gudoomiye
2. Sen. Maxamuud Axmed Maxamuud "Mashruuc". — Guddomiye Ku Xigeen
3. Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf — Xoghayn
4. Sen. Mustaf Maxamed Qodax — Xubin
5. Sen. Yuusuf Geele Ugaas — Xubin

**Xubnaha Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshada-ha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska**

1. Sen. Cabdi Axmed Dhuxulow — Gudoomiye
2. Sen. Deeqo Xasan Xuseen — Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Hodan Maxamuud Cusmaan — Xogheyn
4. Sen. Bootaan Bare Samatar — Xubin
5. Sen. Farxaan Cali Xuseen — Xubin
6. Sen. Muuse Suudi Yalaxow — Xubin

**Xubnaha Urur Haweenka Baarlamaanka Golaha Aqalka Sare:**

1. Sen. Shugri Aadan Maxamed - Guddoomiye
2. Sen. Zamzam Ibraahim Cali — Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Deeqo Xasan Xuseen — Guddoomiye Ku Xigeen
4. Sen. Fartuun Cabdiqaadir Faarax Karaama — Khaznaji
5. Sen. Zamzam Daahir Maxamuud — Xoghayn
6. Sen. Timiro Maxamed Cali — Xubin
7. Sen. Faadumo Xasan Aadan "Geriyoo" — Xubin
8. Sen. Jawaahir Axmed Cilmi — Xubin
9. Sen. Saciido Xasan Xuseen — Xubin
10. Sen. Muno Xasan Cumar — Xoghayn
11. Sen. Nuura Faarax Jaamac — Xubin

12. Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf — Xubin  
 13. Sen. Hodan Maxamuud Cusmaan — Xubin

### Waxii La faafiyey ama La daabacay

Xeer-hoosaadka Aqalka Sare	Nuqulka 1aad	11 Abriil 2017
Warbixin Sanadeedka 2017	Nuqulka 1aad	15 Jannaayo 2018









KALA SOCO AMA KALA SOO XIRIIR  
GOLAHA AQALKA SARE EE B.F.S.

---

✉ @AqalkaSare or @SenateSom

✉ @AqalkaSare or @SenateSom

✉ info@Senate.gov.so or sg@senate.gov.so

🌐 Senate.gov.so